Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGAAH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 12aad Muqdisho, 07 April 2025 Lr. 1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo.Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee WasaaraddaMaaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

**SHARCI**

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# Bilaha

# JAN - March

# 2025

Tixraac:XRW/373/01/2025 Tariikh: 23/01/2025

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA BIXID 29 JAN 2025 EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada** **Muqdisho**
**Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada** **Muqdisho**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **Muqdisho**

**UJEEDDO: GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA "ISTIRAATIIJIYADDA DOWLADNIMADA DANABAYSAN"**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad faqradaha (a) iyo (e); ee Dastuurka KMG, Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG,

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **XW/WI&T/036/2024** ee ku taarikheysan **14/12/2024** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Isgaarsinta & Teknolojiyadda ee "Istaraatiijiyada Dowlanimada Danabaysan";

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW03.106.01.25** ee **23/01/2025** kuna saabsan ansixinta **"Istaraatiijiyadda Dowladnimada Danabaysan"** oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimada ay leedahay in sare loo qaado bixinta adeegyada Dowladda si loogu faa'ideysto tiknolojiyadda casriga ah loona fududeeyo habka adeegga bulshada ku helayaan;

**Waxaa uu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.03.106.01.25** ee **23/01/2025**, kuna saabsan ansixinta **"Istaraatiijiyadda Dowladnimada Danabaysan"** oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey;

## Qodobka 2aad

## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Isgaarsiinta & Tiknolajiyadda loo igmaday in ay hirgeliso, meelmarisana "Istaraatiijiyadda Dowladnimada Danabaysan"

## Qodobka 3aad

## Dhaqangal

Go'aanka Golaha waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Istaraatiijiyaddanna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومـــــال الفدرالية
وزارة الاتصالات والتكنولـوجيا
مكتب الوزير

Somali Federal Republic
Ministry of Communications & Technology
Office of the Minister

**Ref:** XW/WI&T/036/2024 **Date:** Dec 14, 2024

**Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS** **-Muqdisho-**

Og: Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS -Muqdisho-

Og: Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada -Muqdisho-

Og: Wasiir Ku/xigeenka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada -Muqdisho-

**Ujeeddo: <u>Soo-gudbin Istaraatijiyadda Dawladnimada Danabaysan</u>**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XJFS waxay si xushmad leh halkan ugu soo gudbinaysaa **Istaraatijiyadda Dawladnimada Danabaysan (E-Government Strategy).**

Diyaarinta Istaraatijiyaddan waxaa eegis ku sameeyay Sharci yaqaanada Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Guddi-hoosaadka Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha, Wasaaradda Cadaaladda iyo Garyaqaanka Guud ee Dawladda si loo hubiyo in aanay ka hor imanaynin Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.

Haddaba, Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada waxay ka codsanaysaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha in Istaraatijiyaddan loo gudbiyo Xubnaha Golaha Wasiirada si loo Ansixiyo.

Mahadsanid,

Xil. Maxamed Adam Macalin Cali "Somali"

**Wasiirka Isgaarsiinta & Teknolojiyada XFS.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA OFFICE OF THE MINISTER XAFIISKA WASIIRKA MINISTRY OF POST, TELECOMMUNICATION & TECHNOLOGY WASAARADDA BOOSTADA, ISGAARSIINTA & TIGNOOLAJIYADDA

**Summad: XGG/117/2024** **28/04/2024**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda XFS** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda XFS** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci ku saabsan "ISTARAATIJIYADDA DAWLAD DANEBAYSAN"

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya Warqadda Summaddeedu tahay: **WC&AD/XAWSH&H/1024/2024** ee ku taarikheysan **27/01/2024**, kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "ISTARAATIJIYADDA DAWLAD DANEBAYSAN"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci **Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idin kugu soo gudbinayaa "Istaraatijiyadda Dawlad Danebaysan" oo ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, kadib markii uu darsay Nuqulka Istaraatjiyaddani oo abuuraysa hannaan maamul oo lagu hirgelinayo nidaamka dawlad danabaysan, uuna ku sameeyay hagaajin iyo toosin sharci aan looga maarmin, ayaa waxa uu Xafiisku ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirada sii ay u ansixiyaan, maadaama aanay ka hor imaanayn dastuurka iyo shuruucda dalka.

**FG:** Waxa halkan ku lifaaqan Nuqulka Istaraatjiyadda Sare ku xusan.

**Wabillahi Towfiiq**

**Avv. Xuseen Xasan C/llaahi**
**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**
**Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada**

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
**Ministry of Justice and Constitutional Affairs**
**Office of Director Legislations and Agreements Department**

**SUMMAD: WC&AD/XAWSH&H/10.29./2024** **TR. 27/01/2024**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: <u>SOO-GUDBIN "ISTARAATIJIYADDA DAWLAD DANEBAYSAN"</u>**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa "Istaraatijiyadda Dawlad Danebaysan" oo abuuraysa hannaan maamul oo lagu hirgelinayo nidaamka dawladda danabaysan.

Istaraatijiyaddan oo ay diyaarisay Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda, waxay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurku ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan istaraatijiyadaha.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiiska sharci ee ku aaddan istaraatijiyadaha ka guto, si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 28/01/2024

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=



Dr. Yusuf
29.01.2024

# Istaraatijiyadda Dowladnimada Danebaysan

(2025-2029)

Janaayo 2025

https://Moct.gov.so/

# TUSMO

## Contents


TUSMO ..... 2

Oraahda Wasiirka ..... 2

Arar 3

1. Hordhac. ..... 4

1.1 Ujeedadda Istiraatiijiyadda. ..... 4

1.2 Nuxurka Istaraatijiyadda Qaranka ..... 8

1.3 Dersidda Xaaladda ..... 9

1.4 Saamileyda ..... 11

1.5 Halbeega Caalmiga ah ..... 13

1.6 Qaabdhismeedka Istaraatiijiyadda Dawladnimadda Danabaysan ..... 16

Erey Bixin ..... 17

2. Aragti iyo Himilo ..... 18

2.1 Aragtida ..... 18

2.2 Himilada ..... 18

3. Ujeedooyinka Istaraatiijiyadda Qaranka ..... 18

4. Xeerdejinta, Hawlgalka iyo Habdhahaqanka ..... 19

4.1 Shabakadda Lafdhabarta Dawladda ..... 22

5. Caqabadaha ..... 22

6. Mabaadiida ..... 25

6.1 Adeegyada iyo Macluumaadka ..... 25

6.2 Shuraakada iyo Wadashaqeynta ..... 25

6.3 Sugidda Amniga iyo Ilaalinta Siraha ..... 26

6.4 Dhiirigelinta Hal-abuurka ..... 26

6.5 Iskaashi iyo Wadashaqeyn ..... 27

6.6 Faa'iidooyinka Dawladnimada Danabaysan ..... 27

6.7 Dhijitalka loo Dhan Yahay ..... 28

6.8 Marinada Adeegyada Danabaysan ..... 28

7. Hirgalinta Hindisayaasha Dawladnimada Danbaysan ... 34
7.1 Aragtida Koowaad: Adeegbixin Nidaamsan ... 34
7.2 Aragtida Labaad: Kordhinta Aqoonta Dhijitaalka ah ee Bulshada ... 34
7.3 Aragtida Saddexaad: Koruqaadidda Hufnaanta Dawladda ... 35
7.4 Aragtida Afraad: Xaqiijinta Daahfurnaanta dawladda ... 35
8. Hindisayaasha Adeegyada Dawladnimada Danbaysan ... 35
A. Adeegyada dhamayskatiran ee Iswadka ah ... 37
B. Kordhinta Aqoonta Dhijitaalka ee Bulshadda ... 39
C. Hufnaanta Dawladda ... 40
iv. Hindisaha Guud ee Dawladda ... 41
D. Daahfurnaanta Dawladda ... 42
9. Habka Maamulka Dawladnimadda Danabaysan ... 44
10. Qodobadda Xasaasiga ah: Kormeerka, Qiimaynta Guusha iyo Khataraha ... 45
10.1 Guusha ... 45
10.2 Dersidda Khatarta ... 47
10.3 Kormeerka iyo Qiimaynta ( Monistoring And Evaluation) ... 49
11. Qorshe Hawleedka Istaraatiijiyadda Dawladnimada Danabaysan ... 50

# Oraahda Wasiirka

Ka dib markii ay dawladaha dunidu yaqiinsadeen xawaaraha horumarka tiknoolojiyadda, horumarka dhaqaale iyo kan bulsho ee ay dadka u leedahay, ayay dedaal u galeen hirgalinta sida ugu habboon ee ay uga faa'idaysan karaan waxtarka cilmiga tiknoolojiyadda casriga ah. Sidaas daraaddeed, waxaa lagamamaarmaan noqotay in dawladuhu ay ka guuraan hababkii hore ee lagu shaqeyn jiray ama loo mari jiray bixinta adeegyada dadweynaha. Waxaana loo jihaystay lajaanqaadka aaldaha tiknoolojiyadda casriga ah, kuwaas oo looga faa'iidaysan karo casriyeynta iyo fududeynta habsami-u- socodka shaqada iyo bixinta adeegyada dawladda. Haddaba, si looga miradhaliyo ujeeddooyinkaas, waxaa diiradda la saaray tayeynta, sahlidda iyo hufnaanta adeegyada dawladuhu ay bixiyaan, iyada oo laga faa'idaysanayo tiknoolojiyadda casriga ah.

Haddaba, annagoo maanka ku hayna horumarka iyo isbeddelka tiknoolojiyadda casriga ahi ay suuragalisay, isla markaana garowsan muhiimadda kafaa'idaysigeedu uu u leeyahay horumarinta bixinta adeegyada dawladda ayaa Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda JFS garowsatay sida ay lagamamaarmaanka u tahay horumarinta iyo hirgalinta hannaanka dawladnimada danabaysan taas oo horseedi karta bixinta adeegyo tayo sare leh oo daboolaya baahiyaha dadweynaha. Hadaba, si taas loo gaaro, waxaan dejinnay Istaraatiijiyad Qaran oo ujeeddadeedu ay tahay casriyeynta hay'adaha dawladda, sare-u-qaadidda tayada adeegyada dawladda iyo kajawaabista baahiyaha dadwaynaha. Istaraatiijiyadan waxay qayb ka tahay qorshe siyaasadeedka guud ee xukuumadda ee ku aadan danabeynta bixinta adeegyada dawladda iyo horumarinta kaabayaasha dhijitaalka ah ee Soomaaliya.

Sannadihii la soo dhaafay, dawladda Soomaaliya waxay ku guulaysatay dhismaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, isla markaana waxaa la meelmariyey shuruucda iyo xeerka lagu maamulo. Haddaba, xaqiijinta dowladnimada danabaysan waxay suurtagalinaysaa in si dhaw loo derso habsamida bixinta adeegyada dawladda iyo dhakhso-u-meelmarinta wax-ka-beddelka hadba meeshii gaabis uu ka jiro. Sidaas daraadeed, horumarinta kaabayaasha dhijitaalka ah waxay horseedaysaa in siyaabo badan looga faa'iidaysto teknoolajiyada casriga ah, iyadoo loo marayo shaqaaleysiinta shakhsiyaad leh khibrad, aqoon iyo xirfadaha muhiimka u ah fulinta barnaamijka dawladnimada danabaysan. Qorshahaan waxaa loogu talagalay in uu noqdo mid ku habboon isticmaalayaasha, kuna filnaada filashada adeeg-helayaasha. Ugu dambeyn, Barnaamijka dawladnimada Danabaysan waa qorshe muhiim u ah in hay'adaha kala duwan ee Dawladda Soomaaliya ay sida ugu habboon uga faa'iidaystaan aaladaha tiknolojiyada casriga ah.

**Mudane Maxamed Aadam**
**Macalim Cali ( Somali).**
Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo
iknoolajiyadda, XFS.

# Arar

Horumarka iyo isbeddelka Tiknolojiyaddu wuxuu saameyn togan ku yeeshay habka iyo hanaanka ay hay'ddaha kala duwan ee dowladuhu u maareeyaan bixinta adeegyada dadwaynaha iyo sidoo kale wadashaqeynta hay'adaha dawladda. Sidoo kale, ka faa'idaysiga Tiknolojiyaddu wuxuu fududeeyee baahiyaha ay dawladahu u qabaan yareynta kharashaadka maamulka, sare-u-qaadida adeegyada, adeeggaarsiinta iyo tayeynta shaqooyinka hay'adaha dawladda.

Hadaba, ka faa'idaysiga Tiknoolojiyaddu waxay dawladda u suuragelisaa helidda fursado cusub oo u sahlaya dedejinta wax-ka-beddelka hanaanka adeeg bixinta iyo hawl-socodsiinta Wasaaradaha, hay'adaha dawladda iyo waaxyahooda kala duwan.

Sidaas daraaddeed, dawladnimadda danabaysan waxay kor uqaadaysaa, fududaynaysaana:

- Xiriirka hay'addaha kala duwan ee dowlada.
- Hal-abuurka.
- Kordhinta wax-qabadka.
- Hufnaanta shaqada dawladda.
- Daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka.
- Helida xog dhaba.
- Go'aan qaadasho ku dhisan xog dhaba.
- Wada shaqaynta hay'addaha kala duwan ee Dowladda.
- Cilmibaarista.
- Ganacsiga.
- Caafimaadka iyo iwm.

Siyaasada Qaranka ee ICT-ga (2019-2024) waxay ujeeddadeedu ku qotontaa suurtagelinta horumar taabbagal ah oo ay Somaliya ka gaarto istcimaalka aaladahaha dhijitaalka ah iyo isgaarsiinta casriga ah. Isbeddelkan casriga ah oo ku dhisan aqoon iyo kaqaybgal buuxa oo bulsho, yoolkiisuna yahay horumarinta dhaqandhaqaale iyo hanashada himilooyinka. Istaraatiyidda Qaranka ee ICT-ga waxay mudnaan siisaa kaguulgaaridda lix arrimood, kuwaas oo loogu talagalay taageerada horumarinta qaybaha ICT-ga. Waxaa tiir dhexaad u ah kaguulgaaridda iyo xoojinta siyaasadda horumarinta dhaqaalaha ku dhisan dawladnimadda danabaysan. Hadaba, qorsheyaasha hormuudka u ah hiigsiga istaraatiyadda qaranka waxaa ka mid ah: wax-ka-qabashada saddex arrimood kala ah, iskuxidhka hay'adaha dawladda, hirgelinta nidaam xogeed furan iyo adeegbixin hufan.

Cilmibaaris ku salaysan xog-u-ruurin iyo waraysiyo toos ah, lehna falanqeyn iyo falcelin dhammaystiran oo laga sameeyey waxtarka dawladnimada danabaysan, waxay gacan ka geysatay fahmidda muhiimadda ay leedahay isticmaalka iyo ka faa'daysiga tiknoolajiyadda, lafaguridda

caqabadaha, kororsiga khibradda, qiimeynta maamulka, maareynta musiibooyinka, hagidda horumarka ganacsiga iyo waxsoosaarka dalka.

Ugu dambeyn, Istaraatijiyadda Qaranka ee ICT-ga waxaa ku cad qorshayaasha iyo hindisayaasha ay Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyaddu kaga miradhalinayso dawladnimada danabaysan.

# 1. Hordhac.

## 1.1 Ujeedadda Istiraatiijiyadda.

Ujeedada Istaraatiijiyadda Qaranka ee E-government-ga ee Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyaddu waxay hagaysaa isla markaana horseed u noqonaysaa isbeddelka danabaysanta hanaanka adeeg bixinta Dawladda Soomaaliya. Waxay bulshada usuuragalisaa adeegbixin dawladeed oo hufan iyo dhaqaala- kobcin dhijitaal ah. Yoolka guud ee Istaraatiyadda Qaranku waa ku guuleysiga hirgelinta hindisayaasha dawladnimadda danabaysan ee dalka loo qorsheeyey.

Hababa, ka guulgaaridda hirgelinta barnaamijyada dawladnimadda danabaysan waxay ku habboon yihiin:

- Qorsheynta istaraatijiyadda isgaarsiinta qaranka.
- Qaabeynta qorshe hawleedyada wasaaradaha.
- kamiradhalinta hiigsiga horumar danabaysan.
- Danabeynta hay'adha dawladda oo dhan.
- Fulinta hindisayaasha dawladnimada danabaysan.
- Kormeerka iyo qiimeynta adeegsiga dhijitaalka.
- Katakhalusidda caqabadaha.
- Hirgalinta hoggaamin hufan.
- Dhisidda maamul wanaagga.
- Dhiirrigelinta waxsoosaarka.
- Hal-abuurka ganacsiga.
- Sugidda amniga qaranka.
- Agaasinka iyo iskuduwidda shaqooyinka hay'adaha dawladda.
- Horumarinta waxbarashada dhijitaalka ah ee dalka.
- Kobcinka kartida iyo karaanka shaqaalaha dawladda.
- Ladagaallanka musuqmaasuqa iyo saboolnimada.
- Ilaalinta sirta qaranka iyo xogaha muwaaddiniinta.
- Difaaca iyo xoojinta midnimada dalka.
- Hagidda iyo dhisidda wacyiga bulshada.
- Kordhinta dakhliga fardiga ah.
- Horumarinta warbaahinta dhijitaalka ah iwm.
- Kahortagga cudurrada iyo horumarinta caafimaadka.

Taabbagelinta dawladnimadda danabaysan oo ay dhammaan hay'adaha dawladda ku guulaystaan adeegsiga aaladaha dhijitaalka ah, waxaa fure u ah: hirgelinta iyo kaguulgaaridda dibuhabeynta dawladnimadda danabaysan. Si taas loo gaaro, waxaa jira dhawr qorshe istiraatijiyadood oo u baahan in la xuso:

- Dibuhabeynta hay'adaha dawladda ee lagamamaarmaanka u ah taabbagelinta dawladnimadda danabaysan waxay door weyn ka qaadataa horumarinta dalka iyo casriyeynta dawladnimada.
- Dhiirigalinta wadashaqaynta ka dhexaysa wasaaradaha dawladda.
- Hurumarinta kaabayaasha isgaarsiinta dalka.
- Tayeynta aqoonta ICT-ga.
- Iskuxidhka qaybaha dawladnimadda danabaysan.
- Dhiirrigalinta maamuldaadejinta.
- Awood-dhiska hay'adaha iyo wakaalada dawladda.
- Jaangoynta siyaasadaha danabaysan.
- Horumarinta dhaqandhaqaale ee dalka.
- Nidaaminta habnololeedka bulshada.
- Shaqabixinta iyo yareynta shaqo la'aanta.
- Kawarhaynta dadka baahiyaha gaarka ah qabo.

Istaraatiijiyadda dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya ee **2025**, waxay ku qotontaa dhammaan arrimaha kor ku xusan. Waxa ay ku faahfaahsan tahay qaybaha qormadan istaraatijiyeed ee hoose.

Istaraatiijiyaddu waxay la jaanqaadeysaa Siyaasadda Qaranka ee ICT iyo Istaraatiijiyadda **2019-2024**. Intaa waxaa sii dheer, habka hirgelinta istiraatiijiyaddu waxa uu ku qotomaa oo hagayaa afar ujeeddo istiraatiijiyadeed. Wuxuu si weyn wax ugu biirinayaa tiir kasta oo ka mid ah afarta tiir ee sare ku xusan iyo ujeeddooyinka Qorshaha Isbadalka Qaranka Soomaaliya ee **2025 -2029.**

***Shaxda 1: Wax-ku-biirinta dawladnimadda danabaysan ee Qorshaha Isbadalka Qaranka:***

| Wax-ku-biirinta Dawladnimadda Danabaysan ee Soomaaliya ee Qorsha Isbadalka Qaranka | | |
|---|---|---|
| **Soomaaliya QIQ 2025 – 2029** | | |
| **Siyaasad loo dhan yahay (Tiirka 1)** | • Dakhliwadaaga iyo faddaraaleynta maaliyadda.<br>• Xiriirka dawlad goboleedyada.<br>• Qaabdhismeedka dawladnimada Soomaaliya.<br>• Nidaamka doorashada iyo diiwaangelinta codbixiyayaasha. | • Xaqiijisa kaqaybgalka muwaaddiniinta ee siyaasadda dawladda iyo nidaamka qaabeynta Dalka Soomaaliya.<br>• Hagidda iyo hagaajinta wacyiga bulshada Soomaaliyeed.<br>• Koruqaadida mabaadiida iyo ujeedooyinka ku saabsan dhijitaalinta muwaadinka iyo danabaynta dimoqraadiyadda. |
| **Amniga iyo kaladambeynta Sharciga (Tiirka 2)** | **Dambiyada Saaybarka**<br>• Maalgelinta amniga Saaybarka.<br>• Kashaqaysiinta Tiknolojiyadda. | • Bixinta aqoonsi gaar ah oo ku saleysan shaqsiyaad mudan si ay ku galaan kanaalada kala duwan ee elektiroonigga ah ee dawladda ay adeegsanaysa. |
| | • Hawlgelinta Amniga Saaybarka Qaranka ee wax- ku-ool ah u ah hay'adaha adeegsada Saaybarka. | • Bixinta aqoonsi ku salaysan kaabayaasha muhiimka ah ee dadweynaha waxtarka u leh. |
| **Horumarinta Dhaqaalaha (Tiirka 3)** | • Taabbagelinta maamul dhaqaale oo hufan.<br>• Si masuuliyad leh uga faaiidaysiga ilaha dhaqaalaha qaranka. Tusaale, beeraha, gaadiidka, tamarta, maaliyadda, kaabayaasha karaanka dadka iyo ganacsiga.<br>• Horumarinta kaladuwanaansho dhaqaale oo joogto ah, waxtarna leh.<br>• Dhiirigelinta kobaca ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah. | • Dhiirigelinta ganacsiyada guud iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay.<br>• Hagaajinta hannaanka ganacsiga.<br>• Kobcinta ICT-ga ganacsiga iyo waxsoosaarka warshadaha. |

| | | |
|---|---|---|
| **Horumarinta Bulshada (Tiirka 4)** | • Dhawrista bulshada Soomaaliyeed iyo daryeelkeeda guud.<br>• Xal waara u helidda barakacayaasha Soomaaliyeed.<br>• Qaabeynta qaabdhismeed bulsho oo hufan.<br>• Maamul iyo maareyn wanaagsan. | • Dhisidda wacyiga bulshada.<br>• Taabbagalinta dawladnimada, waddaniyadda iyo islaxisaabtanka.<br>• Horumarinta dhaqaalaha iyo iskufilnaanshaha bulshada.<br>• Horumarinta hannaanka adeegbixinta iyo adeeghelidda.<br>• Dhiirrigelinta maamul wanaagga iyo mudnaansiinta muwaaddiniinta Soomaaliyeed.<br>• Kobcinta akhris iyo qoraalka dhijitaalka ah ee danabaysan. |

Hirgelinta Istaraatiijiyadda Qaranka waxay u baahan tahay dedaallo isku xidhan oo ka yimaada dhammaan hay'adaha dawladda. Afarta ujeeddo ayaa istaraatiijiyaddan loo abuuray si ay gacan uga geystaan meelmarinta dawladnimo danabaysan. Arrimaha ugu muhiimsan ee ay Istaraatijiyadda Qaranka cuskan tahay waxay ku jadwaleysan yihiin qaybaha soo socda ee qormo istaraatijiyadeedda.

## 1.2 Nuxurka Istaraatijiyadda Qaranka

Nuxurka iyo ujeeddooyinka Istaraatiyadda Qaranku waa:

- Koruqaadidda iyo ka faa'daysiga aaladaha tiknoolajiyadda.
- Casriyeynta isgaarsiinta  dhijitaalka ah ee dalka.
- Casriyeynta adeegyada hay'addaha dawladda.
- Xoojinta kajawaabidda baahiyaha bulshada.
- Dhijitaaleynta adeegyada asaasiga ah.
- Horumarinta dhammaan kaabayaasha dhaqaalaha.

Waddamo badan ayaa hirgeliyey dawladnimada danabaysan, kuwaas oo ICT-ga ay u tahay udub dhexaad. Waxayna u adeegsadaan:

- Tayeynta adeegbixinta.
- Qorsheynta iyo fulinta mashaariicda horumarineed.
- Lajaanqaadka isbedelka tiknoolajiyadda.
- Wax-qabadka iyo hal-abuurka.
- Dhisidda wacyiga dhijitaalka ah ee bulshada iwm.

Gaaridda yoolashan ayay Soomaaliya hiigsanaysaa, Sidaas daraaddeed, qodobbada ku saabsan ka gaashamashada guuldarrooyinka iyo darsidda xaaladahu waxay ku cad yihiin qodobka 1.3 ee Istiraatiijiyadda Qaranka.

Marka la fulinayo hindisayaasha barnaamijka dawladnimadda danabaysan si loo gaaro guud ahaan yoolasha istaraatiijiyadeed ee dawladnimadda danabaysan, hirgelinta istaraatiijiyaddu waxay la socotaa oo la jaanqaaddaa xaaladda dalka, waxayna u hagaysaa hababka ugu wanaagsan ee halbeega caalamiga ah. Isla markaana waxaa loo isticmaalayaa hababka ugu habboon ee ka jawaabaya dawlad-dhiska, horumarka, iyo maamul wanaagga.

Dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya waxaa lagu hormarinayaa adeegbixin bulsho oo dhamaystiran, waxay sare u qaadaysaa guud ahaan dhaqaalaha, waxbarashada iyo ka faa'idaysiga awoodda ICT-ga ee horumarinta hay'adaha kala duwan ee dawladda.

Si taas loo gaaro, hadafka dawladnimada danabaysan waa kormeeridda iyo qiimeynta isbeddelka, sare-u- kaca adeegsiga tiknoolijiyadda ee horumarka xuddunta u ah, baahinta adeegyada dawladda, horumarinta heerka qanacsanaanta adeeg-heleyaasha, islaxisaabtanka, xilgudashada iyo gaarista yoolka horumar loo dhan yahay.

Istaraatiijiyada dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya ee 2025**,** ayaa laga filayaa in ay garab socoto qaabdhismeedka saxda ah ee isticmaalka xogta, dhisidda kaabayaal maamul oo ku habboon hagidda dalka, mideynta adeegsiga tiknoolajiyadda, daahfuranta wadashaqeynta, kajawaabidda baahiyaha dadwaynaha iyo danabaynta dhammaan adeegyada maamul ee Dalka Soomaaliya.

Marka la eego xaaladda Soomaaliya, waxaa muuqataa udiyaarsanaan, marka ay timaaddo hirgelinta iyo fulinta dawladnimo danabaysan, maadaama tayadda kaabayaasha ICT-ga ee dalka iyo awoodda isticmaalayaasha ee ganacsiga iyo dawladdaba ay isticmaali karaan ICT-ga, taas oo noqonaysa furaha go'aaminaya guusha hindisayaasha dawladda ee dawladnimadda danabaysan.

Dhammaan arrimahan sare ku xusan si wanaagsan ayaa loo falaqeeyay, loonaa waafajiyey xaaladda dalka, waxaana lagu saleeyey qaabdhismeed ku habboon marxaladaha dalka ee loo adeegsaday dejinta iyo diyaarinta istaraatiijiyadda dawladnimadda danabaysan ee **2025 - 2029**, taas oo ujeeddadeedu ay tahay hirgelinta iyo baahinta barnaamijka dawladnimadda danabaysan, oo lagaga jawaabayo baahiyaha loo qabo dibu-habeynta iyo dar-dargalinta hay'addaha kala duwan ee Dawladda Soomaaliya.

## 1.3 Dersidda Xaaladda

Dawladda Fedderaalka ah ee Soomaaliya waxay garawsan tahay ka faa'daysiga awoodda ICT-gu u leeyahay koru-qaadista adeegbixinta dadwaynaha. Qorshihii Horumarinta Qaranka ee **2020 - 2024**, ee dhamaaday wuxuu tilmaamayaa in ICT-gu yahay aalad gacan ka geysanaya qorshaha gaaritaanka yoolasha horumarka dhaqandhaqaale ee Dalka Soomaaliya. Ujeedadda Qorshaha kaabayaasha Istiraatiijiyadeed ee Soomaaliya ee **2019-2023** ayaa ahayd in la hubiyo in dalka uu yeesho oo uu wada gaadho moobaylka casriga ah, isla markaana la saxo kala duwanaanshaha helitaanka iyo awood-u-lahaanshaha kaabayaasha ICT-ga. Sidoo kale, waxaa loo qorsheeyey horumarinta adeegyada gudaha iyo dibaddaba ee xarumaha magaalooyinka. Waxaana loo diyaariyey horumarinta kaabayaasha ICT-ga ee looga baahan yahay dhammaan Dawlad Goboleedyada Dalka Soomaaliya.

Laga soo billaabo Janaayo 2023, dadka ku nool Soomaaliya oo ah **17.87** milyan, kuwaas oo 49.9% ka mid ahi ay yihiin dumar, halka 50.1% ay yihiin rag. Dadka miyiga Soomaaliya ku nool waa 52.4%; halka 47.6% ay ku nool yihiin magaalooyinka. Fursad-u-helidda Internet-ku waxay ku qiyaasan tahay 9.8%, taas oo loo turjuman kara in 1.76 milyan ay yihiin isticmaaleyaasha internet-ka . Sidoo kale, waxaa jira koror dhan 138 kun (+8.5%) intii u dhaxaysay 2022 iyo 2023. Tirada isticmaaleyaasha baraha bulshada waxay ku qiyaasan tahay 10.9% oo dadweynaha Soomaaliyeed ka mid ah, iyadoo ay korortay +3.1% intii u dhaxaysa 2022 iyo 2023, taas oo loo turjuman karo inay jiraan 500 kun oo ah isticmaalayaasha cusub ee baraha bulshada. Waxaa xusid mudan in 99.6% isticmaalayaasha internet-ku ay internet-ka ka galaan moobaayladooda gacanta.

Intii u dhaxaysay Janaayo 2022 iyo Janaayo 2023, tirada isticmaasha moobaylada ee bulshada Soomaaliyeed waxay korortay 351 kun (+5.1%), taas oo ka dhigan in 44.7% boqolkiiba tiradda dadweynaha taas oo ah 7.9 milyan.[1].

***Shaxda 2: Jaantuska muhiimka ah ee kobaca sanadlaha ah ee dhijitaalka 2022 - 2023***

| Tilmaame | Tirada | % Dadweynaha | Kororka | % Kororka |
|---|---|---|---|---|
| **Dadweynaha** | 17,870,000 | - | 535,000 | **3.1%** |
| **Inta adeegsata moobaayla da** | 7,990,000 | 44.7% | 351,000 | **5.1%** |
| **Dadka adeegsada Internetka** | 1,760,000 | 9.8% | 138,000 | **+8.5%** |
| **Inta adeegsada Baraha Bulshada** | **1,950,000** | **10.9.0%** | **138,000** | **+3.1%** |

[1] https://datareportal.com/reports/digital-2023-somalia?rq=Somalia

In kasta oo uu jiro kobac ku aadan dhijitaalka oo la qiri karo, haddana Soomaaliya ayaa weli ku jirtaa meel hoosaysa, marka loo eego qiimeynta tusaha horumarka dawladnimadda danabaysan ee Qaramada Midoobay, iyada oo tusaha dawladnimada danabaysan ka haysata 0.1340, kuna jirtay kaalinta 192 ee dhammaan 193 dal ee dunida, sanadkii 2022 kaqayb-galka danabaysan ee Soomaaliya ayaa ahaa 0.2500, iyada oo ku jirta kaalinta 135, waa marka loo eego tusaha 193[2] ee sare lagu xusay. Tani waxay daliil cad u tahay in horumarka dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya uu yahay mid aad u hooseeya, loona baahan yahay in wax laga qabto caqabadaha waaweyn ee ka haysta dhinacyada EGDI-da ee dawladnimadda danabaysan kuwaas oo kala ah, bixinta adeegyada online ka ah, iskuxidhka Isgaarsiinta dadka, iyo halbeegga kaqaybgalka danabaysan sida, wadaaga macluumaadka danabaysan, la tashiga danabaysan iyo go'aangaaridda danabaysan.

Heerka ka qaybgalka danabaysan ee Soomaaliya ayaa tilmaamayaa in uu yahay heer dhexe waa marka loo fiiriyo korodhka fursadaha iyo hal-abuurka ku saabsan dawladnimada danabaysan sidaas darteed, waxaa la dhisayaa barnaamijyo iyo waxqabadyo dawladnimadda danabaysan ku saabsan oo hufan, kuna salaysan aasaas adag oo ka bilaabmaya qorsheyn qumman oo laga tixraacay khibrada laga bartay dalalka kale. Waa aragti ku salaysan yoolalka mustaqbalka fog sida

ku xusan QHQ Soomaaliya, dukumeentiyada istiraatiijiyadeed iyo siyaasadeed ee xiriirka la leh mawduuca istaraatijiyaddan.

Maadaama Soomaaliya ay qorsheyneyso gaaritaanka dawladnimo dhijitaal ah oo dhameystiran, waxaa jira halbeegyo siyaasadeed oo ku habboon, kuna salaysan qaabdhismeedka dawladnimada dhijitaalka ah ee Ururka Iskaashiga Horumarinta Dhaqaalaha ee afka Ingiriiska ku ah *Organization for Economic Co- operation and Development (OECD)* uu dejiyey. Haddii si buuxda loo hirgeliyo istaraatijiyaddan, waxay abuuri doontaa jawi dhijitaal ah oo si fiican u qalabaysan, buuxiyana shuruudaha bulshadda isticmasha dijitaalka ah ee Soomaaliya ay higsanaysa iyo daboolidda baahiyaheeda dhaqaalaha. Halbeegyadan waxaa ka mid ah:

- *Dhijitaaleynta geeddisocodka loogu jiro naqshadeynta adeegyada lagu bixin doono dawladnimada danabaysan*. Dawladdu waa in ay marka koowaadba ka fikirtaa sababaha lagu gaari karo guulo ku saabsan isbedelka mustaqbalka fog, iyada oo lagu xisaabtamayo awooddaha tiknolojiyadda iyo xogta dhijitaalka ah si dib loogu fikiro, dib loogu qaabeeyo, loona fududeeyo dawladda inay soo gudbiso adeeg hufan oo waara; muwaadinka Soomaaliyeedna uu wax ka hoggaamiyo qaybo ka mid ah, iyada oo aan loo eegin kannaalka uu doorbidayo isticmaaluhu.
- *Dawladnimo ku dhisan macluumaad-ururinta ilaa waaxyaha dawladda ay noqdaan kuwa ay xogtu hagto.* Xogtu waa istiraatijiyad iyo udub dhexaad u sahlaysa hay'adaha dawladda in ay yeeshaan iskaashi iyo wadashaqeyn ku aadan dhanka dhijitaalka iyo dawladnimada danabaysan ah.
- *Taabbagelinta hanaan xogeed daahfuran,* iyadoo la raacayo mabda'a daahfurnaanta, daacadnimada iyo islaxisaabtanka, dawladda waxaa ka go'an taabbagelinta xog daahfuran si ay xal ugu hesho caqabadaha la wajihi kara iyo maareynta dhibaatooyinka ku gadaaman.
- *Xoojinta maamulka xogeed ee dhijitaal ah oo ay dawladdu dalka ku hogaamiso, kuna maamusho adeegyada looga baahan yahay, isla markaana ku sahasho adeegyada ay bixinayso. Tan oo noqonaysa tallaabo diiradda lagu saarayo baahida isticmaalaha iyo u-adeegidda dadwaynaha*. Muwaadiniinta guud ahaan iyo ganacsatada gaar ahaan, waa in ay galaangal u yeeshaan in ay u soo bandhigaan shuruudahooda dawladda; dawladduna waa in ay caawisaa oo ay hagtaa, kuna hagtaa siyaasad qorsheysan oo dhijitaal ah, bixisaana adeegyo bulsho oo hufan.
- *Yagleelidda madal dawladeed oo danabaysan taas oo loogu talagalay in loogu adeego danaha dadweynaha*. Dawladda ayaa bixinaysaa dhaqaalaha ku baxayo abuuridda madashan si ay ugu sahasho shaqaalaha dawladda sameynta qorshayaal iyo bixinta adeegyo tayo sare leh.
- *Dejinta siyaasadda iyo gaarsiinta adeegga*: Dawladdu waxay odorosaysaa jaha siyaasadeedkeeda timmaaddada dhaw iyo midda fog si ay degdeg uga jawaabto baahiyaha dadwaynaha eek u aadan adeeg-bixin danabaysan.

### 1.4 Saamileyda

Shirkadaha gaarka loo leeyahay, kuwa aan dawliga ahayn, muwaadiniinta, siyaasiyiinta, shaqaalaha dawladda, waaxyaha wasaaradaha, wakaaladaha iyo bixiyayaasha adeegyada tiknolojiyadda, gacan-ka- geystayaasha hawlaha horumarinta, dawlado iyo hay'addo kale ayay suurtagal tahay inay dhammaantood noqdaan daneeyayaasha dawladnimadda danabaysan ee Dalka Soomaaliya.

Mashaariic badan oo dawladnimadda danabaysan ku aadan ayaa diiradda saaraya fikradaha iyo aqoonta maamul ee dadweynaha. Mashaariicdan waxaa xal waara loogu helayaa caqabadaha hor istaagi karaya daneeyayaasha muhiimka ah ee doonaya in ka qaybgalaan geeddisocodka habboon ee Soomaaliya ay ugu guurayso dawladnimada danabaysan. Helidda macluumaad la xidhiidha ujeedooyinka iyo fikradda mashaariicda. Waa tallaabo horseedaysa hormar iyo guul maamul dawladeed danabaysan.

Yoolalka horumarinta adeegyadda danabaysan ee lagu daboolayo baahiyaha iyo rabitaanka muwaadiniinta Soomaaliyeed waxaa kor loogu qaadayaa waxqabadka iyo waxtarka dawladda ee ku jawahan u-adeegidda dadka Soomaaliyeed. Tallaabadan ujeedkeedu waa in si hufan oo hawlkarnimo leh loo maamulaa mashaariicda loo qoondeeyey in lagu hormariya dalka Soomaaliya iyo dadkiisa.

Waxaa kale oo muhiim ah in laga fikiro sidii ay uga qayb qaadan lahaayeen dhammaan daneeyayaasha horumarka Soomaaliya si ay gacan uga geystaan qorshayaasha horumarinta bulshada iyo gaarsiinta adeegga danabaysan ee uu dadweynuhu u baahan yahay. Tallaabadan waxay horseedi kartaa wanaajinta hindisaha dawladnimadda danabaysan ee lagu xoojinaya kalsoonida dadweynuhu ay ku qabaan dawladda iyo qorshayaasheeda siyaasadeed ee ay hormuudka u tahay danabaynta adeegyada dowladda.

[2] https://publicadministration.un.org/egovkb/en-us/Data/Country-Information/id/158-Somalia

## 1.5 Halbeega Caalmiga ah

Dowladnimadda danabaysan waxay shaki la'aan dhabbaha u xaaraysaa mustaqbal leh hirar wanaagsan iyo hiigsi wacan oo soomaaliya ku talaabsato. Waxayna muhiim u tahay kobcinta filashooyinka iyo rajooyinka wacan ee dadweynuhu uu ka finayo helitaanka adeegbixin danabaysan Sidoo kale, dowladnimadda danabaysani waxay bulshada u sahlaysaa suurtagalnimada helitaanka kobac-dhaqaale, maamul wanaag, qorshayn iyo fulin isla socota, isla markaana leh kormeer iyo qiimayn tayaysan oo loogu adeegayo danta guud iyo baahiyaha muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Si loo gaaro yoolka dawladnimadda danabaysan, waaxaa la adeegsanayaa istiraatijiyad heer sare ah oo lagu horumarinayo kaabayaasha dawladnimadda danabaysan oo bilaw ah, ilaa adeegga ugu dambeeya ee la doonayo lagu suurtageliyo adeegbixinta dawladnimada danabaysan.

Dawladnimadda danabaysan ee aduunka oo dhan waxay leedahay ujeedooyin kala duwan, waxaana loo adeegsadaa habab kala duwan si loo horumariyo danta dadka iyo dalka. Faa'iidadeeda tallaaba-talaabada ahi waa in la qiyaasi kara guulaha mashruuc kasta oo dawladnimadda danabaysan ah iyo suurtagalnimada yareynta khataraha hindisayaasheeda looga hortagaya, laguna maareynaya.

Qaramada Midoobay waxay horumarisay 5 marxaladood oo cabbirro u ah taabbagalka dawladnimada danabaysan. Shantan marxaladood waxay kala yihiin:

- **Marxaladda Koowaad:** Dhisidda iyo adeegsiga mareegaha, weebsaydka oonlaynka ah.
- **Marxaladda Labaad:** Mareegaha ay dawladdu leedahay ee ay maamusho waxay bilaan nuxurka dawladnimada danabaysan, waxayna xoojiyaan waxtarka warbaahineed ee dawladda iska leh.
- **Marxaladda Saddexaad:** Isticmaalayaasha mareegaha waxay la macaamili karaan waaxaha iyo hay'adda ay la xidhiidhayaan, iyaga oo isticmaalaya foomamka, iyo emailada.
- **Marxaladda Afraad:** Isticmaalayaasha mareegaha waxay ka faa'iideysan karaan adeegyada dawladnimada danabaysan, iyaga oo lacagta ku bixinaya hab oonlayn ah.
- **Marxaladda Shanaad:** Waxaa jira isdhexgalka buuxa oo ku saabsan adeegyada ay bixiso dawladnimada danabaysan ee maamulka waaxaha hay'adaha dawladda.

Daraasad la sameeyey ayaa baaritaan ku sameysay xogta 100-ka magaalo ee ugu waaweyn adduunka, uguna horeeya. Muddada daraasaddaas waxay ku jaango'nayd 2003–2016. Natiijadii ka soo baxday daraasadaasna waa sidan soo socota[3]:

**A. Arrimaha saamaynta leh ee dibbadda**

i. Tiirarka dhaqandhaqaale ee muwaaddinka sida, waxbarashada, hantida iyo helitaanka teknolojiyada**:** Meel kasta oo ay dadku yihiin kuwa leh aqoon teknoolojiyadeed, dawladuhuna ay aad ugu heellan in ay bixiyaan adeegyada danabaysan, waxaa ka jiraa rabitaan badan oo ah in laga qayb qaato maamulka teknolojiyadeed ee dawladnimada danabaysan.

**Arrimaha deegaanka:** Doorka Dawladdu waa wanaajinta adeegga danta u ah deegaanka iyo gaarsiinta teknolojiyadda uu dadka u baahan yahay iyo hal-abuuridda adeegbixin danabaysan oo ku habboon dadka iyo deegaanka, sidaas awgeed, waxay arrintan dardargelinaysaa hanashadda dawladnimada danabaysan.

**B. Arrimaha saamaynta leh ee Gudaha**

i. **Arrimaha siyaasadda:** Dawladda waxay caddeysaa doorka masuulka la doortay, hoggaanka hufan ee hawlkarknimo iyo sidoo kale jiheynta teknolojiyadda ay u adeegsanaysa wanaajinta arrimaheeda gudaha. Qaadashada istaraatiijiyadda mustaqbalka ee dawladnimadda danabaysan waa danta dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

ii. **Ilaha dhaqaalaha iyo Waxsoosaarka Guud ee Gudaha**: Dawladaha hodanka ah waxay maalgaliyaan hawlgallada maamul fulineed iyo joogteynta hormarka dalka, waxayna had iyo jeer diyaar u yihiin maalgashiga teknolojiyadda iyo fulinta qorshayaasha maamulka ee dawladnimadda danabaysan ee ay Soomaaliya higsanaysa.

**C. Arrimaha Hay'adaha**

i. **Tartan Goboleedka**: Sababo la xiriira rejada weyn ee ay muwaadiniintu ka qabaan dawladdooda in ay kaalin fiican kaga jirta tartanka hormarineed ee gobolka, dhinaca tiknolojiyaddana ka horumarsan tahay, kaalin sarana ay kaga jirta hormarinta gobolka ayaa saamayn togan ku leh muuqaalka maamulka ee dawladnimada danabaysan ee Soomaaliya.

[3] Marxaladaha maamulka dawladnimadda danabaysan iyo Qodobbada soo dedejiya horumarkeeda, eGovSpace, ayaa la helay 28 Agoosto 2021, https://www.egovspace.co.in/stages-of-e-governance-and-factors-that-accelerate- its-evolution/

ii. **Dimuqraadiyad Shaqaynaysa oo wax ku ool ah**: Maamulka danabaysan waxa uu ka hirgalaa, kana hanaqaadaa waddamada dimuqraadiga ah ee horumarsan kuwaas oo u ogolaanaya dadku in uu ka dalbada hoggaankooda xuquuqdooda iyo wanaajinta heerkooda nololeed ee saxda ah. Dawladda waxaa lagu qiimeeyaa daryeelka muwaadiniinta iyo daboolidda baahiyaha bulshada, marka laga eego waxtarkeeda iyo hufnaantada maamul.

Halbeega hindisayaasha dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya marka la barbar dhigo Jaantuska Horumarinta ee Qarammada Midoobay ee dawladnimadda danabaysan, Soomaaliya taagan tahay heerka 1- aad. Hiigsiga istaraatijiyaddan waa in Somaliya ay gaarto heerka 5-aad ee Jaantuska Horumarka Qaramada Midoobay. Arrintan waxay u baahan tahay agaasin wanaagsan oo lagu fuliyo qaabdhismeedka istaraatiijiyadeeddan si looga dhigo mid la qaadan kara, laguna gaadhi kara hiigsiga loo socda.

Qaabka ugu wanagsan ee la taaban kara, laguna gaadhi kara hiigsiga waa horumarinta hufnaanta nidaamka, dhijitaaleynta xogaha, bixinta adeegyo wanaagsan, iyo tixgelinta go'aannada waxtarka leh ee dadweynaha, isla markaana leh habraac qeexan oo muujinaya awoodda uu u leeyahay inuu wax ku darsado horumarka qaran ee go'aanqaadasho sana ka dib[4].

Hirgelinta hindisayaasha kala duwan ee dawladnimada danabaysan ee Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada hababka ugu wanaagsan ee ay ka soo dheegatay Hindiya waa lix hab oo kala ah[5]:

- Joogteynta horumarinta tayadda adeegbixinta dawladnimadda danabaysan.
- Isdhexgalka iyo iskuxidhnaanta muwaadiniinta Soomaaliyeed ee wanaagsan.
- Iskuxidhka adeegbixiyayaasha isticmaalaya adeegga dawladnimada danabaysan.
- Kordhinta iyo tayaynta Isticmaalka teknolojiyada.
- Dahfurnaanta iyo sinaanta hayaddaha dawladda.
- Dhiirigelinta waxbarashada, wadashaqeynta iyo iskuduubnida

[4] Sami M. Alhomod iyo Mohd Mudasir Shaafi "Dhaqdhaqaaqyada ugu Wanaagsan ee dawladda E: Dib u eegis lagu sameeyay Qaar ka mid ah Moodooyinka Hal-abuurka leh ee laga soo jeediyay Waddamo kala duwan" Joornaalka Caalamiga ah ee Sayniska Korantada & Kombiyuutarka IJECS-IJENS Vol: 12 No: 01
[5] Ibid

## 1.6 Qaabdhismeedka Istaraatiijiyadda Dawladnimadda Danabaysan

Qaabka loo qaatay in loo adeegsado hirgelinta hawlaha dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya waxaa soo jeediyay Abdelbaset Rabaiah iyo Eddy Vandijck 2009.[6] Waxay ku salaysan tahay habdhaqanka ugu wanagsan ee dawladnimadda danabaysan oo lagu qaabeeyey daraasadda istiraatijiyadaha dawladnimada danabaysan ee 20 waddan: Australia, Belgium; Denmark; Austria; Japan; Finland; France; Canada; Germany; Korea; Singapore; Jordan; Egypt; UK, India, New Zealand, USA, Malaysia, Brazil iyo Netherlands, iyo Midowga Yurub. Xulashada dalalkan way kala duwan tahay. Waxay muunad u yihiin qaaradaha oo dhan, dalalka soo koraya iyo waddamadda ugu sareeya dhanka heerka horumarka dawladnimadda danabaysan sidaas darteed, waxaa laga qaatay aragti guud oo ku saabsan xeeladaha ama istaraajiyadda la darsay ee wasaaraddu u dejisay dawladnimada danabaysan ee Soomaaliya.

Daraasadu waxay baadhay waxyaabaha ay wadaagaan ee ka mid ah xeeladaha kala duwan ee ay dawladuhu u adeegsadaan xaqiijinta barnaamijyadooda dawladnimadda danabaysan inkasta oo ay kala duwan yihiin yoolalkooda iyo hiigsiyadooda.

Habka istiraatijiyadeed ee dawladnimada danabaysan waa mid guud. Waxaa la qaadan karaa istaraatiijiyad kasta oo horumarka dawladnimada danabaysan ku salaysan, kaas oo ku habboon dawladnimada danabaysan ee ay waddo Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda.

Habka istaraatijiyaddan waxa uu soo jeedinayaa in ay jiri karaan istaraatijiyad loo sameyn kara adeegyada gaarka ah ee la siinayo muwaadiniinta Soomaaliyeed. Waxay u qaybsan tahay 2 qaybood, qayb kastaana waxay leedahay naqshado u taagan qaybta dawladnimada danabaysan sida hoos ku qoran:

- **Xafiiska Raaca Hore**
  - Aragtida.
  - Ujeedooyinka istiraatijiyadda.
  - Isticmaalayaasha adeegyada.
  - Qaababka gaarsiinta adeegyada.
  - Mabaadi'da hagigaya.
  - Tubaha.
- **Xafiiska Raaca Dambe**
  - Meelaha mudnaanta leh.
  - Hindisayaasha waaweyn.
  - Kaabayaasha muhiimka ah.
  - Hay'adaha dawladda
  - Habraacyada.

Qaabdhismeedka hawlqabashadan waxa uu u diyaarsan yahay in lagu daro naqshado qaabdhismeedyo kale, lana cusboonaysiin karaa qaybo gaar ah, iyada oo aan waxba loo dhimin hannaankiisa guud, isla markaana si buuxda ayaa loo faafin kara Istaraatiijiyada Dawladnimada danabaysan ee Soomaaliya 2023.

---

[6] Abdelbaset Rabaiah iyo Eddy Vandijck "Qaabka Istaraatiijiyadeed ee Maamulka (dawladnimadda danabaysan): Guud iyo Dhaqanka Ugu Wanaagsan"

## Erey Bixin

| | |
|---|---|
| **AI** | Garaadka macmal ah (GM) oo afka qalaad ku wa *artificial intelligence*, waa barnaamij ka mid ah cilmiga kombiyuutarka oo u falgalo sida dadka, una falceliya sida aadanaha. |
| **BOT** | Is-hage waa barnaamij kombiyuuter oo u shaqeeya sida dadka. |
| **BPO** | Saamisiinta Ganacsiga. |
| **CIO** | Madaxa Macluumaadka |
| **CSC** | Xarumaha Adeegyada Guud. |
| **CSF** | Qodobbada Muhiimadda Guusha. |
| **CTI** | Islafalgalka Kombiyuutarka iyo Taleefoonka |
| **EGDI** | Tusaha Horumarka Dawladnimada Danabaysan. |
| **EPART** | Tusaha Kaqaybgalka Danabaysan. |
| **DFS** | Dawladda Faddaraalka Soomaaliya |
| **G2B** | Min Dawladda ilaa Ganacsiga |
| **G2C** | Min Dawladda ilaa Manafacaadsadaha. |
| **GIS** | Nidaamka Xogta Juqraafiga. |
| **HR** | Manafacaadka Shaqaalaha. |
| **ICT** | Xogta Tiknooloojiyadda Warisgaarsiinta. |
| **IoB** | Internet-ka Iskuxirka Aaladaha. |
| **ITV** | Falgalka Fogaan-aragga. |
| **IVR** | Falgalka Kafalcelinta Codadka. |
| **KPI** | Muujiyaha Waxqabadka Muhiimka ah. |
| **KYC** | Barashada Bulshadaada. |
| **MDA** | Wakaaladda Waaxaha Wasaaradda. |
| **MoCT** | Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknooloojiyadda. |
| **NCA** | Hayadda Isgaarsiinta Qaranka. |
| **NCC** | Guddiga Iskuduwidda Qaranka. |
| **NTP** | Qorshaha isbadalka Qaranka. |
| **OECD** | Ururka Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarinta. |
| **OGP** | Qorshe Dawladdeed Furan. |
| **PFI** | Hindiseyaasha Maalgelinta Gaarka ah. |
| **PKI** | Liistada Kaabayaasha Dadweynaha. |
| **PIAP** | Goobaha Internet-ka Guud. |
| **PPP** | Shuraakada Danta Guud iyo Danta Gaar. |
| **QR** | Tixraac Degdegga ah |
| **R&D** | Cilmibaarista iyo Horumarinta. |
| **RTI** | Xuquuqda Xoghelidda. |
| **SEO** | Milgeynta Mashiinka Xograadinta. |
| **SLA** | Heshiiska Heerka Adeegga. |
| **SoS** | Nidaamka Nidaamyada. |
| **SWOT** | Falanqeynta Kartida, Karti la'aanta, Fursadaha iyo Caqabadaha. |
| **UN** | Qaramada Midoobay. |
| **USSD** | Xogta Adeegga Dheeriga ee aan Dheellitirnayn. |
| **WGA** | Habka Dawlad Wadareedka. |

# 2. Aragti iyo Himilo

## 2.1 Aragtida

Aragtida Istiraatiijiyadda Qaranka waa kadhigidda dawlad bixiso adeeg wax-ku-ool ah, hufan oo daahfuran, kana jawaabayo baahiyaha muwaaddiniinta Soomaaliyeed.

## 2.2 Himilada

Himilada Istaraatiijiyadda Qaranka waa wanaajinta bixinta adeegga dawladda, iyada oo loo marayo bixinta adeeg bulsho oo tayo leh, helitaan jawaabcelin hufan, gaarsiinta muwaaddiniinta macluumaadka iyo adeegyada dawladda, mar kasta iyo meel kasta, iyadoo la adeegsanayo ICT-ga. Waxay Soomaaliya u beddelaysaa dal leh dhaqandhaqaale dhijitaal ah oo loo dhan yahay, ayna hormuud u tahay dawladnimo danabaysan.

# 3. Ujeedooyinka Istaraatiijiyadda Qaranka

Ujeeddada guud ee Istaraatijiyadda Qaranka waa:

- Waxqabad wanaagsan.
- Hufnaan iyo hagar la'aan maamul.
- Hoggaan hormuud u ah horumar qaran.
- Horumar bulsho iyo baraaro nololeed.
- XaqiijintaYoolka Dawladnimadda danabaysan.
- Caddaald iyo sinnaan adeegbixin iyo adeeghelid

iwm. Ujeeddooyinka gaarka ah ee dawladnimadda

danabaysan waa:

- Suurtagelinta isbeddelka dhijitaalka ah ee ku habboon badqabka deegaanka, siyaasadda, sharcidejinta, fulinta iyo dhammaanba laamaha iyo qaybaha hay'adaha dawladda.
- Dheellitirka hoggaamin horumarka, fududeynta adeegbixinta, iskudubbaridka hawlaha hay'adaha dawladda, agaasimidda wadashaqeynta, hagidda mashaariicda horumarineed, hawlgelinta shaqaalaha dawladda, iyo maareynta musiibooyinka dabiicciga ah iyo kuwa dadsameega ah iyo maamulidda dawladnimadda danabaysan si waafaqsan dastuurka iyo shuruucda dalka oo heerka caalamka la jaanqaadi karta, danna u ah nabadda iyo nidaam wanaagga Dalka Soomaaliya.
- Xaqiijinta helidda iyo bixinta adeeg ku habboon, una sahlan muwaaddiniinta Soomaaliyeed.
- Dhimidda iyo dheellitiridda kharashaadka ku baxa maamulka guud ee macluumaadka.
- Unkidda madal qaran iyo ganacsi oo isku xidha adeegyada danabaysan ee hay'adaha dawladda.
- Samaynta xarumo adeegbixin danabaysan oo tiknoolajiyadda lagu gaadhsiiyo miyiga iyo meelaha ka fog magaalooyinka waaweyn ee ay ku nool yihiin muwaaddiniinta

Soomaaliyeed.

- Hormarinta adeegyada danabaysan ee u danta ah ganacsiyada miyiga.
- Xoojinta dawladnimada danabaysan ee waxtarka u leh horumarka, hufnaanta, islaxisaabtanka, xilgudashada, ladagaallanka musuqmaasuqa, midnimada iyo maamul wanaagga dalka.
- Horumarinta iyo hawlgelinta waxsoosaarka danabaysan ee Dalka Soomaaliya.
- Si wanaagsan uga faa'iidaysiga aaladaha casriga ah ee ku hobboon nabadda iyo horumarka dalka.
- Abuuridda jawi danabaysan oo soo jiidanaya maalgashi caalami ah oo dalka ku habboon.
- Korinta iyo kobcinta tababbarrada danabaysan ee waxtarka u leh xirfadaha muwaaddiniinta.
- Horumarinta iyo hagidda isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda Dalka Soomaaliya.
- Dhiirigelinta iskaashiga caalamiga ah iyo midka gobolka ee ku hobboon ICT-ga.
- Horumarinta qorsheynta, fulinta, kormeerka iyo qiimeynta hawlaha dawladda.

## 4. Xeerdejinta, Hawlgalka iyo Habdhahaqanka

Qodobka 18-aad ee Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Fedderaalka Soomaaliya waxa uu dammaanadqaadayaa xorriyadda hadalka iyo ra'yiga, xorriyadda saxaafadda oo ay ku jiraan dhammaan noocyada warbaahinta danabaysan iyo kuwa ku salaysan mareegaha ama weebsaadyada.[7].

Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017, wuxuu dhigayaa habka lagu maamulayo qaybta ICT-ga oo ay ku jirta sameynta nidaamiye cusub oo ICT ah - Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ). Qodobbada 3-aad Faqradiisa 1-aad iyo qodobka 41-aad faqradiisa 1-aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka (SIQ) ayaa HIQ siinaya awood ay ku maamusho isgaaadhsiinta iyo sidoo kale adeegyada internet-ka iyo baahinta wararka. Waxay sidoo kale xaqiijinaysaa tartanka cadaalada ah ee qaybtan si loo ogolaado koritaanka. Sharcigan ayaa caawinayaa hawlaha amniga qaranka ee dawladda ay ku foogan tahay sababtoo ah, wuxuu hagayaa aasaas sharci ee xakameynta iyo ladagaalanka warbaahinta argagixisada ee halista ku ah ammaanka dalka.

Hawlgelinta Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) waa mid socota oo ku jirto shaqada joogtada ah ee iskuxidhka iyo sameynta Kooxaha Gurmadka Degdegga ah ee Kumbiyuutarka, afka qalaadna ku ah *Cybersecurity Emergency Response Team* kuwaas oo ogaan kara, yareyn kara, kana jawaabi kara khataraha amniga hab danabaysan. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) waxay sidoo kale horumarinaysaa dhowr xeer[8] oo dedaal loogu jira dhaqangelinta Xeerka Isgaarsiinta Qaranka ee 2017.

Isbeddellada sharcidejinta, hawlgalka iyo habdhaqanka hadda socda oo saamayn toos ah ku yeelan doona hirgelinta hindisaha dawladnimada danabaysan waxaa ka mid ah:

**A. Qaybaha Shatiga Midaysan.**

Shatiga Midaysan (SM) waa mid bixiya teknolojiyad waxtar leh iyo adeeg dhexdhexaad ah kuwaas oo awood u siinaya hawlwadeennada shatiyada iyo adeegbixinta shatiyo ka kooban qaybahan: Kaabayaasha Isgaarsiinta (KI), Adeegga Codsiga (AC) iyo Adeegyada Kaabayaasha Isgaarsiinta (AKI). Arrintan waxay sahleysaa isticmaalka tiknolojiyadda ugu qiimaha badan waxqabadkooda adeeg ee ku jaango'an habraaca shatibixinta. Fududeynta iyo habeynta nidaamka shatibixinta waxay yareynaysaa kharashaadka maamulka ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ).

**B. Xeerka Lambareynta.**

Xeerka Lambaraynta Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka Jamhuuriyadda Fedderaalka Soomaaliya ee 2020, waxa uu jaheynayaa habka xakameynta, qorsheynta, maamulka, maareynta iyo qoondeynta agabka lambarrada si waafaqsan Xeerka Isgaarsiinta Qaranka. Xeerku waxa uu dhigayaa xaq-u-lahaanshaha agabka lambarada, xaq-u-lahaanshaha qoondeynta agabka lambaraynta ee loo isticmaalo Isgaarsiinta danabaysan, siyaasada lambareynta ee ku salaysan hannaanka lambarada E.164, Koodhadhka Gaaban (KG) ee loo isticmaalo codka, farriimaha qoraalka SMS-ka iyo adeegyada Isgaarsiinta la xidhiidha, halbeegyada lambarrada, qorshayaasha lambareynta, qabanqaabada kumeelgaadhka ah, diiwaanka lambarrada, hababka wicitaanka macaamiisha, habka codsiga qoondeynta agabka lambarrada, ogeysiinta, qarsoodiga, kanoqoshada, racfaannada, ilaalinta, wax-ka-bedelka lambarada, khidmadaha iyo hawlgelinta waafaqsan shuruucda Isgaarsiinta Dalka Soomaaliya.

[7] Eeg dastuurka ku meel gaadhka ah:http://hrlibrary.umn.edu/research/Somalia-Constitution2012.pdf
[8] Eeg liiska xeerarka:https://nca.gov.so/features/regulations/

**C. Horumarinta Siyaasadda Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyada**

Wasaaraddu waxay diyaarisay siyaasad cusub oo shan sano ah oo ICT ah taas oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada 28/11/ 2019, iyadoo helista kaabayaasha macluumaadka qiimeyn lagu sameeyey saddexdii bilood ee ugu horreeyey iyo saddexdii bilood ee ku xigtay ee sanadkii 2020, lagana soo saaray natiijooyin la xidhiidha suurtagelinta horumarinta siyaasadaha.
Wasaaraddu waxay hadda waddaa diyaarinta sharciyad iyo siyaasad dhijitaal ah oo loo dhan yahay ee dawladnimada danabaysan iyo amniga saaybarka ee ay dalka iyo dadka ugu adeegi doonto.

**D. Soocelinta Dhoomaynka .so iyo rakibida IXP**

Maamulka iyo masuuliyadda .So (dotso) oo ah heerka furaha internet-ka ugu sarreeya ee CCTLD ee Soomaaliya ayaa lagu wareejiyey Xarunta Macluumaadka Shabakadda Soomaaliya (XMS). Bishii Mey ee sanadkii 2018, Xarunta Dhulxulinta Xariga Internet-ka (XDXXI) ee Garoonka Caalamiga ah ee Aadan-cadde ee magaalada Muqdisho ayaa lagu rakibay qalab kasta oo magac adeege ah iyo Barta wax-is-dhaafsiga ee Internet-ka (BWI), kaas oo hadda si buuxda u shaqeysa.

**E. Dejinta Qaabka Diiwaangelinta SIM-kaadhka.**

Horumar weyn ayaa laga gaaray sameynta qaabka diiwaangelinta lambar xogeedka afka qalaad ku ah sim card. Waxay Wasaaraddu dhammaystirtay habka diiwaangelinta lambar xogeedka iyo aqoonsiga dhijitaalka ah ee adeegsadayaasha shirkadaha warisgaarsiinta ee Dalka Soomaaliya ka hawlgala. Natiijooyinka ka soo baxay daraasadahii lagu sameeyey habkan dhijitaalka ah ayaa si weyn uga warbixiyey shaqada aqoonsiga dhijitaalka ah ee hadda socota, iyada oo la raacayo ansixinta Guddiga Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (GHIQ) oo ay ku jirto dhaqangelinta Siyaasadda Aqoonsiga Cusub taas oo la jaan qaadaysa hannaanka diiwaangelinta danabaysan ee caalamka.

**F. Iskuxidhka Qaybta Tacliinta Sare**

Waxaa jirtay taageero laga helay jaallayaasha horumarinta ee afka qalaad ku ah *development partners* kuwaas oo taageeray iskuxidhka Waaxda Tacliinta Sare ee Soomaaliya, iyaga oo maalgeliyey Shabakadda Cilmibaadhista iyo Waxbarashada Soomaaliyeed (SCWS) ee afka qalaad lagu yidhaahda Somali Research and Education Network (SomaliREN) ee isbahaysiga UbuntuNet iyo soo-iibinta Baaxadda bandwidth ee jaamacadaha Soomaaliya oo dhan, iyada oo la raacayo heshiiska 15 sano ee Xuquuqda Isticmaalka aan La dhaafi Karin ee Ingiriiska ku ah Indefeasible Rights of Use IRU, bixinta ilaa 155 Mbit/s oo xawaare internet ah ee jaamacaddaha, iyadoo loo sii marinayo xadhiga STM-1 oo ay ku jirto Barta Joogitaanka (BJ) ee afka qalaad lagu yidhaahda *point of presence* (PoP) ee magaalada Muqdisho ee Caasimadda Dalka Soomaaliya.

**G. Kordhinta Xafiisyada Isgaarsiinta ee Wasaaradaha Muhiimka ah**

Qorshahan kordhinta xafiisyada wasaaradaha muhiimka ah ayaa wajigiisii koowaad guul laga gaadhay, waxaana lagu kordhiyey xafiisyo badan oo noocan la xusay ah oo wasaaradaha dawladda ka tirsan oo ku yaalla Muqdisho iyo Dawlad goboleedyada xubnaha ka ah Dawladda Faddaraalka Soomaaliya, iyadoo guud ahaan ilaa 29 xafiis isgaadhsiineed laga hirgeliyey Muqdisho iyo maamul goboleedyada kala ah: Galmudug, Somaliland, Koonfur Galbeed, Jubbaland, Puntland iyo Hirshabeelle.

### 4.1 Shabakadda Lafdhabarta Dawladda

Sannadkii 2017, waxaa Muqdisho lagu soo gebagebeeyey 48 KM oo ah Fiber Optic loop oo si buuxda u hawlgalay, iyadoo lagu taageerayey 25 wasaaradood oo uu ku jiro Bangiga Dhexe. Heshiiska IRU ee 155 Mbit/s ee xawaaraha caalamiga ah ayaa la sugayey muddo 20 sano ah si loo helo iskuxidhka xafiisyada waaweyn ee dawladda ee Muqdisho ku yaalla. Ka dib markii awoodda bilowga ah ee 155 Mbit/s la hawlgaliyey, baaxadda Bandwidth-na waxaa lagu sii kordhiyey ilaa 620 Mbit/s.

## 5. Caqabadaha

Dawladda Faddaraalka Soomaaliya caqabado badan ayaa hor yaalla oo ay ka mid tahay sidii ay muwaadiniinteeda u gaadhsiin lahayd adeegyo tayo leh. Macluumaadka Isgaarsiinta iyo Tiknooloojiyadda waxa uu muhiim u yahay laammaha kala duwan ee dawladda oo uu fursad u siinayaa in ay ICT-ga u adeegsadaan qalab dibuhabeyn loogu samayey adeegga bulshada maadaama isticmaalkiisu uusan qaali ahayn, yahayna mid la hubo oo laysku halleyn kara, kaas oo u oggolaanaya laammaha uu macluumaadku khuseeyo gudbinta iyo helitaanka macluumaad saxan si degdeg ah oo waafaqsan shuruucda dalka ee ku saabsan ururinta iyo keydinta macluumaadka dadka danta u ah.

Waxa la sameeyey iskuday ah in la habeeyo adeegyada dawladda, iyada oo la sameeyey dhawr habdhammaad ee afka qalaad ku ah *back-end* oo ah habab ka kooban qaybo kala duwan oo u xilsaaran maareynta keydinta xogta, maamulidda macluumaadka oo loo dhisay qaab danabaysan si loogu adeego hawlaha aasaasiga ah ee dadweynaha, waxaana ka mid ah: Nidaamka Maareynta shaqaalaha ( NMS), Hal Rug Adeeg oo afka shisheeye ku ah *one stop shop- OSS* oo ah goob dhexe oo ay macaamiisha ama isticmaaleyaashu ka heli karaan adeegyo fara badan; laguna maamulo macluumaadka ka yimaada adeegbixiyeyaasha ama waaxaha kala duwan. Habkan waxaa loogu talagalay diiwaangelinta ganacsiga, Nidaamka Maareynta Macluumaadka Gargaarka ee af Ingiriiska ku ah *Aid Information Management System AIMS*, Nidaamka Maareynta Macluumaadka Waxbarashada (NMMW), Nidaamka Bangiyada Muhiimka ah sida Bangiga Dhexe ee Soomaaliya (BDhS), Nidaamka Macaamilka ee Soomaaliya (NMS) iyo Nidaamka Warbixinta Soomaaliya (NWS) ee afka qalaad ku ah *Somalia Transaction Automation and Reporting System STARS*, Beddelka Lacagbixinta Qaranka ( BLQ) ee af Ingiriiska ku ah *National Payments Switch*, Diiwaanka Bulshada

Dhijitaalka ah (DBD), iyo Nidaamka Maamulka Dukumentiyada Danabaysan ee loo soo gaabiyo (NMDD) ee Dalka Soomaaliya.

Caqabadaha ka jira hirgelinta adeegyada dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya waxaa inta badan sabab u ah, la'aanta teknolojiyada ku habboon, kalaqaybsanaanta xogaha dhijitaalka ah ee dadka iyo xaddidnaanta miisaaniyadda iyo agabka shaqaalaha.

Soomaaliya waxay leedahay siyaasad 5 sano ah 2019 - 2024 ee ICT taas oo ujeedadeedu ay tahay in wax laga qabto kaabayaasha ICT-ga ee jira iyo daldaloolooyinka kale ee jira. Istaraatijiyaddan waxay diiradda saaraysaa dardargelinta siyaasadda, sharciga, hannaanka sharciyeed, hiigsiga caalamka horumarsan, ilaalinta xogaha macaamiisha ee qarsoodiga ah, bixinta adeegyada dhijitaalka ah, horumarinta ganacsiga danabaysan, caafimaadka danabaysan, waxbarashada danabaysan iyo maamulka danabaysan. Waa habraac wax laga qabanayo caqabadaha ay ka midka yihiin xawaaraha liita ee internet-ka, la'aanta fursadaha shaqo oo ku filan dhallinyarada Soomaaliyeed iyo amnidarrada dalka ka taagan ee ay dawladdu maareynaysa.

Qiimayn lagu sameeyay heerka ay marayso dawladnimadda danabaysan ee qaybaha bulshada iyo saamaynta ay ku leedahay adeegbixinta, iyadoo lagu salaynayo fadhiyo, wareysiyo iyo xogwaraysi laga soo ururiyay daneeyayaasha muhiimka ee dawladnimada danabaysan, waxaa lagu ogaaday caqabado dhawr ah oo saamayn taban ku yeeshay horumarka dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya.

Waxa ka mid ah caqabadahaas:

- Maqnaanshaha dukumeenti istiraatijiyadeed danabaysan.
- DFS oo aan weli la hayn hannaan ganacsi oo wadashaqayneed taas oo keentay in la kala qaybiyo hindisayaasha dawladda dhijitaalka ah, iyadoo qayb kastaa ay u shaqaynayo si gaar ah oo xogta lagu kala qaybiyo, laguna keydiyo silos, sidaas darteedna dawladdu ma aysan helin faa'iidooyinka adeegyada iskudhafan. Tusaale ahaan, iskudhafka Maareynta Maaliyadeed iyo Nidaamka Macluumaadka ee afka Ingiriiska ku ah *Integrated Financial Management and Information System* ee nidaamyada maamul maaliyadeed ee bangiyada oo si tartiib tartiib ah kor loogu qaado lacagaha dhijitaalka ah ee dawladda sida, lacagbixinnada moobaaylka ee dawladda, bixinta adeegyada dowladda iyo faa'iidooyinka dawladda ilaa shaqsiga ama qoysaska ah ee afka qalaad ku ah *goverment to person (G2P) laguna* tijaabiyay shaqaalaha rayidka ah.
- Maqnaanshaha sharci asaasi u ah ururinta iyo isticmaalka xogta muwaaddiniinta si waafaqsan shuruucda dalka iyo sidoo kale macaamilka dhijitaalka ah oo ay ku jiraan xeerarka iyo qodobbada ilaalinta xogta qarsoodiga ah, amniga Saaybarka, macaamilka danabaysan iwm.
- Jiritaan la’aanta adeegyo dhijitaal ah oo kaalmeeyo kaabayaal dadka iyo dalka ka caawin kara in muwaaddiniinta Soomaaliyeed dalka ugu noolaadaan si nabad ah aan cabsi lahayn.

- Maqnaanshaha habraacyo ku saabsan keydinta xogta la wadaago iyo xogaha waxtarka u leh Dawladda Soomaaliya ee ay ku ilaalinaysa badqabka dalka iyo dadka Soomaaliyeed.
- In kasta oo ay jirto shabakad dawladeed oo laf dhabar ah oo u adeegaysa 25 wasaaradood iyo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, waxaa jiraan baahiyo ay Hay'addaha dawliga oo badan u qabaan adeegga danabaysan ee IT-ga (hardware and software) ee ay u baahan yihiin. Dhanka kale, agabka IT-ga iyo awoodda farsamo ee fulinta mashaariicda dawladnimadda danabaysan ayaa ah mid daciif ah.
- Ma jiraan goobo aasaasi ah oo bixiya adeegii loo baahnaa oo ku filan daboolidda baahida baahsan ee loo qabo maamulka danabaysan si loo tayeeyo, loona kordhiyo adeeg sugan ee macaamilka hiigsiga mustaqbalka. Si taas loo gaaro, DFS waa in ay bixisaa adeegyada waxtarka u leh dhismaha kaabayaasha muhiimka ah ee dawladda iyo dadweynaha Soomaaliyeed si ay u kartigeliso dawladnimadda danabaysan. Waxay istaraatijiddan hiigsanaysaa helidda aqoonsi dhijitaal ah. Waddanku wuxuu qaaday tillaabooyin billow ah si uu u taageero hirgelinta nidaamka aqoonsiga dhijitaalka ah, iyada oo loo marayo qaadashada siyaasadda aqoonsiga qaran ee 2019.

DFS waxay aad u danaynaysaa in ay balaadhiso awoodeeda dhijitaalka ah iyo kafaa'iidaysiga kordhinta adeegyada Isgaarsiinta moobaayllada si loo kordhiyo helitaanka dhijitaalka ah ee adeegyada dadweynaha loogu talagalay ee danabaysan. Waxaa aad muhiim u ah in la horumariya hagaha istiraatijiyadeed ee hirgelinta hindisaha dawladnimadda danabaysan, kaas oo lagu samayn kara oo keliya dukumeentiga istraatiijiyadda dawladnimadda danabaysan oo noqon doona:

- In la caddeeyo aragti heer sare ah ee dawladnimadda danabaysan.
- In la hawlgeliya istiraatijiyad xal u ah caqabadaha hor taagan Soomaaliya.
- In la sameeyo habka ugu wanaagsan, ee lagu hanan kara mabaadi'dda hortebinta u leh isdhexgalka, daahfurnaanta, kafaa'iidaysiga kheyraadka, hagaajinta amniga iyo nabadda si ay muwaaddiniinta Soomaaliyeed ugu noolaadaan nabad iyo horumar wacan oo waara.
- In DFS laga taageero sidii loo wanaajin lahaa hawlaha muhiimka ah ee dawladda.
- In la hormariyo hannaanka wadaagidda xogta iyo sugidda ammaanka dalka.
- In la dardargeliyo balaadhinta adeegyada danabaysan ee shanta soo ee socota, lana hormariyo adeegyada warbixineed ee ku habboon nabadda, degganaansha iyo horumarka dalka.
- In hab casri ah looga hortago musiibooyinka ku xeeran meertada nolasha dadka.

# 6. Mabaadiida

Toddobada mabda'a ee soo socdaa waa halbeegyada horumarinta iyo hirgelinta hindisayaasha saldhigga u ah adeegyada dawladnimadda danabaysan ee istiraatijiyaddan mustaqbalka dalka loo dejiyey.

## 6.1 Adeegyada iyo Macluumaadka

Adeegyada iyo maamulka ee dawladdu ku hagaysa muwaadiniinta iyo ganacsiyada waa in ay noqdaan kuwa udub dhexaad u ah horumarka, kuna habboon isticmaalahana, munaasabna ku ah adeegbixinta maamul ee dawladnimada danabaysan ee ay Wasaaraddu uga wakiilka tahay Dalka Soomaaliya.

Dhijitaaaleynta adeegyada dadweynaha la siinaya ee lagu maamulaya dawladdu waa kuwa hufan oo la hubiyey in daboolayaan baahiyaha loo qabo casriyeynta adeegbixinta iyo maamulka danabaysan.

## 6.2 Shuraakada iyo Wadashaqeynta

Hirgaliyayaasha dawladnimadda danabaysan waxa lagu tayeynayaa wadashaqeynta, iskuduubnida qaybaha, waaxaha iyo laammaha dawladda Soomaaliya ee taabbagalinaysa adeegbixinta danabaysan. Adeegsadayaasha ICT-ga ee dawladda ay awood u yeelan doonaan in ay si saxan u wadaagaan macluumaadka, waqtigan la joogo iyo mustaqbalkaba, iyada oo la adeegsanayo fikradda Nidaamka Nidaamyada (NN) ee dawladnimada danabaysan ee heer hay'ad dawladeed, waxayna hay’adaha dawladda awood u yeelan doonaan in ay si tayo leh u wada xidhiidhaan, una wada shaqeeyaan iyaga oo raacaya habraaca ilaalinta madaxbannaanida hawleed iyo maamul ee dawladnimada danabaysan.

Adeegyada macaamilka ee is weydaarsiga farriimaha danabaysan, dukumentiyada danabaysan, codsiyada danabaysan iyo iskaashiga joogtada ah ee u dhaxaysa masuuliyiinta heerarka kala duwan ee dawladda waxay horseedaysaa dhijitaaleynta adeegyada dadweynaha loogu fududaynaya laxidhiidhka hay’adaha khuseeya ee dawladda, laguna xoojinaya wadajirka dalka iyo maareynta dhammaan macluumaadka dawladda ee ku sargo’an horumarinta dalka iyo dadka, ammaanka iyo nabada ee habka danabaysan.

Istaraatijiyaddan waxaa loogu talagalay hagidda iyo hubinta xuquqaha iyo waajibaadka dhijitaalka ah ee ay dawladnimada danabaysan ugu adeegeysa dalka iyo dadka Soomaaliyeed, waxaana la ilaalinayaa:

- Xaqa ay muwaadiniintu u leeyihiin in aysan hay’ad siin ama bixin xog isku mid ah, tusaale, xogta ciwaanka ee rasmiga u ah qaybaha dawliga ah in ka badan hal mar, loona ageegsan khalad.
- Xaqa ganacsaduhu uu u leeyahay in uusan bixin xog isku mid ah, siinna hay’adaha dawliga ah in ka badan hal mar
- Xaqa Hay'adaha dawladda ee weydiisashada isgaarsiinta dhijitaalka ah.

### 6.3 Sugidda Amniga iyo Ilaalinta Siraha

Marka la fulinayo waajibaadyada dawladnimadda danabaysan, waa in la sugaa amniga, sirahana la ilaaliyaa si loo hubiyo in dukumeentiyada dawladnimadda danabaysan, xogta sirta ah lagu ilaaliya nidaamyada ICT- ga, lagana ilaaliya cid aan loo fasixin gelidda galalka xogaha danabaysan iyo helidda macluumaadka sirta ah ee dawladda ee ku xafidan galalka lagu xidhay lambar sireedka. Xoojinta amniga iyo ilaalinta siraha qarsoodiga ee dawladda waxay xaqiijiyaan isticmaalka saxda ah iyo maaraynta macluumaadka shakhsiyeed iyo macaamilka ee ay istaraatijiyaddan qaran ku jaango'an tahay, looguna talagalay, si guud.

Muwaadiniinta iyo ganacsiyada isticmaala adeegyada dawladda ee dhijitaalka ah, waxaa kalsooni ku abuurayaa nidaamyada danabaysan ee dawladda oo u dammaanadqaadayaa badbaado xogeed iyo horumar ganacsi oo dhijitaal ah kaas oo lagu sugaya amniga, sharci, siraha qorsoodiga ah ee ka dhexeeya dawladda iyo muwaaddiniinta, kana hortagaya faragelinta dadka halista ku ah galalka xogeed ee sirta u ah dalka.

Dawladdu waxay ay bixinaysaa aqoonsiga danabaysan ee afka qalaad ku ah *e-identity*, iyadoo ku dedaalaysa in ay hubiso in qof kasta oo Soomaali ah uu helo aqoonsiga danabaysan ee dalka. Aqoonsiga danabaysan waxa uu dawladda u sahlayaa in ay caddayso dadkeeda, iyada oo aan la xidhiidhin qof ahaan. Muwaadin kasta waxaa la siin doonaa kaarka aqoonsiga iyo kaarka lahaanshaha moobaaylka kaas oo ay hay'adaha ku shuqul leh ku siin karaan habraac danabaysan oo lagu keydinaya xogta muwaaddinka laga diiwaangeliyey, loona diiwaangeliyey ee uu ka midka yahay saxiixiisa iyo sawirkiisa danabaysan. Habkan waa habraac ay Wasaaraddu ku sugaysa ammaanka iyo nabadgelyada muwaaddiniinta Soomaaliyeed.

### 6.4 Dhiirigelinta Hal-abuurka

Dawladdu waxay dhiirrigelinaysaa oo horumarinaysaa hal-abuurka cusub ee waxtarka u leh dalka, dadka iyo diinta Islaamka, waxayna kobcinaysaa oo xoojinaysaa cilmibaadhista ay kula soconaysa horumarka tiknoolajiyada ee waxtarka leh, una adeegsanaysaa habka dhijitaalka ah ee hannaankeeda maamulka ay ku maareynaysa mashaariicda hal-abuurka leh ee isticmaalka tiknoolajiyadda cusub ee hadda wax-ku-ool ah iyo tiknoolajiyadda horumarsan ee mustaqbal la naawilaya, loona baahan yahay.

Istaraatijiyaddan qaran ee ay wasaaraddu dejisay, waxay boorrinaysaa in ay Dawladdu dhiirrigeliso tartanka hal-abuurka cusub iyo waxsoosaarka oo ku abaal-marin doonta muwaaddiniinta Soomaaliyeed ee la yimaado hal-abuur iyo waxsoosaar cusub oo horumar u leh dalka iyo dadka Soomaaliyeed. Si loo koriyo, loona kobciyo horumarka dhaqaalaha dalka, loona helo miisaaniyad dheellitiran, waxay Wasaaraddu qorshaysay oo ay istaraatijiyaddan dhiirrigelinaysaa qabashada carwo tiknoolajiyadeed danabaysan oo afka

qalaad ku ah *TECHFEST* taas oo sanadle ah, ayna kuguulaysteyaashu ku helaan lacag abaalmarin dawladeed ah si ay u horumariyaan fikradahooda dhaqaala-abuur oo lagu daabici doono, laguna baahin doono warbaahinta qaranka. Hay'adaha maamulka dawladda (ugu heerka sarreeya waa in ay horumarkan dawladnimadda danabaysan ay hiigsanaysa qayb ka wada noqdaan, dhiirrigeliyaanna.

### 6.5 Iskaashi iyo Wadashaqeyn

Dawladnimada danabaysan ee ay wasaaraddu ku foogan tahay, waa mid lagu abuurayo jawi ku habboon wadashaqeynta qaybaha hay'adaha gaarka loo leeyahay ay ku caawin karta dawladda, iyada oo lagu taabbagelinaya dawladnimada danabaysan, isla markaana lagu awoodsiinayo farsamada *ICT-ga* si hufnaan loo maamulo mashaariicda dawladnimada danabaysan ee horumarinda Dalka Soomaaliya.

Iskaashiga iyo wadashaqeynta dawladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay waxa lagu dhiirigelinayaa abuuridda iyo dhisidda iskaashi istiraatijiyadeed oo ay la yeelato hay'adaha gaarka loo leeyahay si looga faa'ideysto aqoonta, xirfadaha, khibradaha iyo agabka danabaysan ee hay'adaha gaarka loo leeyahay. Yoolka arrinta waa aqoon iyo khibrad ay wadaagaan dawladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay oo dan u ah dadka iyo dalka Soomaaliyeed taas oo lagu xoojinayo maan iyo maskax wadaag danabaysan.

### 6.6 Faa'iidooyinka Dawladnimada Danabaysan

Faa'iidooyinka dawladnimadda danabaysan way badan yihiin, waxaase ugu horreeyaa in muwaaddiniinta ay helaan adeegyada dawladda ay bixiso ayaga oo aan u tagin xafiisyada dawladda qof ahaan balse loogu adeegayo hab dhijitaal ah oo danabaysan. Si taas loo gaaro lWasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda oo ka wakiil ah Dawladda Soomaaliya, loona igmaday horumarinta dalka ee dhanka Isgaarsiinta iyo tiknoolajiyadda, waaxa ay dedaal hagar la'aan ah gelinaysaa sidii ay hiigsigan istaraatijiyadeed u gaadhi lahayd, meeshana uga saari lahayd caqabadaha hortaagan bixinta adeegyada danabaysan oo loogu adeegi kara muwaaddiniinta Soomaaliyeed hab iyo hannaan *online* ah oo lagu horumarinayo kaabayaasha dhaqaalaha, sugidda ammaanka, baahinta nabadda iyo badqabka muwaaddiniinta, xoojinta midnimada, difaaca dalka, dadka iyo diinta, iyada oo laga faa'iideysanaya ICT-ga iyo adeegyada danabaysan ee ay istiraatijiyaddan qaran daarran tahay. Sidaas darteed, faa'iidooyinka dawladnimada danabaysan aad bay u fara badan yihiin, waxtarna ugu leeyihiin horumarka iyo sookabashada Dalka Soomaaliya oo dhan.

### 6.7 Dhijitalka loo Dhan Yahay

Hiigsiga iyo himilada istaraatijiyaddan waa in ay dawladdu u xaqiijisaa dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed in ay siiyo fursad dhijitaal oo loo dhan yahay, isku midna ah dhanka usinnaanta oo ay kaga qaybqaataan, ugana faa'iidaystaan adeegsiga nidaamyada ICT-ga, iyada oo aan loo eegin lab iyo dheddig, da'yari iyo da'weynaan, aqoon iyo aqoon la'aan, gobol iyo gude caasimadeed, xanuun iyo caafimaad iyo wax kasta oo kale. Ujeedku waa in bukaanka Soomaaliyeed adeegga danabaysan loogu adeegaa, muwaaddinka caafimaadka qabana lagu hormariyaa waxsoosaarkiisa muruq iyo maanba ee waxtarka leh.

Keliya 9.8%[9] dadka Soomaaliya ku nool ayaa haysta adeegga internet-ka, waxaa weli jira qaybo badan oo dadweynaha ka mid ah oo ay aad u liidato helitaanka adeegga internet-ka iyo kaabayaasha kale ee muhiimka ah ee ICT-ga, taasi waxay carqalad iyo caqabad ku tahay horumarka iyo waxsoosaarka mawaaddiniinta.

Istaraatijiyaddan waxay gacan ka geysan kartaa horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha, maalgelinta kaabayaasha, abuuridda iyo kobcinta dakhliga, kafaa'iideysiga aaladaha garaadka leh, tayeynta xirfadaha iyo wax-ka-kororsiga waayo-aragnimada aqoonyahannada ITC-ga, maaminta juqraafiga miyiga iyo mamagaalooyinka, waxbarashada, qoraalka qumman ee af Soomaaliga ee dhijitaaleysan, xawaaraha iyo tayada adeegga internet-ka iyo dhammaan horumarka kala duwan ee dadka iyo dalka Soomaaliyeed.

### 6.8 Marinada Adeegyada Danabaysan

Si loo dhiirigaliyo hanashada iyo hubinta dawladnimadda danabaysan, dawladdu waxay bixinaysaa adeegyada dawladnimadda danabaysan ku habboon, laguna sargooyey, iyada oo loo marayo marinno badan oo isgaadhsiineed. Waa marinno dhur iyo dheef u leh horumarka aragtida muwaadinka Soomaaliyeed, una wanaagsan tayada adeegbixin adeeghelidda ee dawladda iyo dadkeeda ay shuraakada sharci ku yihiin.

Waa marinno muhiim u ah horumarka ku lammaan dawladnimadda danabaysan, lehna faa'iidooyin la mahadin doono. Waa marinno istaraatijiyadeed oo lagu fulinayo qorshayaasha dawladeed ee la dejiyey, kalana duwan ee dawladnimadda danabaysan, lehne shuruudo, habraacyo iyo ujeedooyin bulsh-adeegida ee adeegga.[10] danabaysan ee dhanka dhijitaalka iyo casriyeynta tiknoolajiyadda ku halbeegan.

Marinnadan muhiimka ah waxaa ugu doorroon kuwan soo socda[11]:

- **Marinka Online-ka ah:** Waa xidhiidhka tooska ah ee ay dadka kula xidhiidhayaan dawladda ee leh qaabbilaadda miiska hore, xidhiidhka telefoonka xidhiidhka ama waraaqaha ee la isku dhaafsada e-mailka iyo farriimaha afaka qalaad ee Ingiriiska loogu soo gaabiyo SMS.
- **Marinka Offline-ka:** Waa habka boostada iyo isgaadhiinta DHL-ka ee lagu xidhiidha.
- **Xawaaraha Adeegbixinta:** Marinkan waa lacagbixinta ee ku dhisan xawilaadda degdegga ah ee taleefoonka iyo habka xawaaladda aan degdeg ahayn sida lacagbixinta iyo lacaghelidda jeegga.
- **Amniga iyo Sirta:** Dawladnimada danabaysan waxay xoojinaysaa marinka loo maraya helidda macluumaadka xasaasiga ah iyo ilaalintiisa oo ah waajibaad iyo xuquuq dawladeed oo sugan.
- **Marinka Warbaahinta**: Marinka warbaahinta waa marinka warisgaadhsiin ee ay doonayso Wasaaraddu in ay tayeyso, casriyeyso oo dhijitaaleyso habka dawladnimada danabaysan.

---

9 https://datareportal.com/reports/digital-2023-somalia?rq=Somalia

10 Habka qiimaynta ee adeegyada dawladnimadda danabaysan ee kannaallada badan leh,https://www.researchgate.net/publication/289641224

11 Europeancommission (2004) Bixinta kanaalka badan ee adeegyada dawladda.*http://www.egov.pku.edu.cn/download/fw.pdf, [La galiyay 18 Agoosto 2021].* Isweydaarsiga Xogta udhaxeysa Maamulka Barnaamijka Amsterdam, Netherlands, Enterprise DG.

Dawladdu waxay qaadanaysaa istaraatiijiyad marinno badan leh oo fursad u siinaya dadweynaha in ay ku isticmaali karaan siyaabo kala duwan, kuna heli karaan adeegyada dawladda.[12]. Sidaa darteed, danabeynta iyo dhijitaaleynta marinnada sare ku xusan iyo kuwan hoosaba dalka waa u muhiim.

**i. Tayeynta Xawaaraha Internet-ka**

Dawladdu waxay dhisi doontaa mareeg qaran oo lagu tayeynaya adeegbixinta dawladnimada danabaysan taas oo si toos ah u siinaysa muwaadiniinta in ay helaan adeegyada dawladeed oo *online* ah. Barta dawladda ayaa martigelin doonta oo jahaeyn doontaa dhamaan mareeg hoosaadyadda wasaaradaha kuwaas oo isticmaali leh hal astaan oo adeegyo badan ka kooban. Astaantu waxay hubinaysaa in dhammaan mareeg hoosaadka ay u ekaadaan mareegta guud, yeeshaanna hal qaab oo isku mid ah. Waa hab wasaarad kasta u oggolaanaya in ay yeelato mareegta midabkeeda iyo calaamadaheeda ku habboon. Dhammaan adeegyada dawladnimadda danabaysan waxay hawlgelayaan 24/7 ee 365 maalmoodba danta guud loogu adeegaya.

**ii. Moobaaylka**

Dhammaan adeegyada dawladda waxa la filayaa in ay noqdaan kuwa lagu heli kara taleefoonnada gacanta iyo aaladaha kale ee la qaadan kara. Maadaama telefoonaka gacanta uu yahay aalad internet-ka diyaar ku ah, si fududna loogu heli kara ama bixin kara adeegyada danabaysan, istaraatijiyaddan waxay daarran tahay in ay la moobaayllada casriga ah la jaanqaadaan dawladnimada danabaysan si weyn uga faa'iidaystaan isticmaaleyaasha, maadaama ay wanaagsan yihiin oo horumarsan yihiin. Celceliska waqtiga lagu qaato mareegta, xawaaraha internetka iyo iskuxidhka warbaahinta adeegsanaysa khadka tooska ah, mashiinka raadinta danabaysan ee Search Engine Optimization SEO ku ah afka qalaad waxay dhammaan waxtar u leeyihiin bixinta iyo helidda adeegga hufan ee dawladnimada danabaysan. Waxaa la tayeynayaa:

- Adeegyada ku xidhan taleefoonka gacanta.
- Adeegyada farriimaha SMS.
- Barnaamijyada mobaayllada caaqilka ah.
- Xoghelidda iyo keydinta Unstructured Supplementary Service Data USSD.
- Kusheekeysiga Bots ama Chat Bots casriga ah ee ay dadku ku wada hadlaan.

### iii. Xarunta Wicitaanka.

Dawladdu waxay samayn doontaa xarun wicitaan oo ah adeegyada dawladda ee dawladnimadda danabaysan oo bixin doonta adeegyo hufan oo habboon, kuna dhisan waaya-aragnimo iyo aqoon casriyeysan oo cilmiyeysan ee wadaxidhiidhka kuxidhan iyo kabaxsan ee afka qalaad ku ah in-bound and out-bound. Xarunta wicitaanku waa in ay si cilmiyeysan oo casriyeysan u fulisaa hawlahan soo socda:

- Kobcinta farsamada muwaadiniinta iyo ganacsiyada adeegsanaya mareegta dawladda ee dawladnimadda danabaysan ee waxtarka iyo faa'iidooyinka u leh horumarka dalka.
- Faafinta waxqabadka dawladda ee dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya.
- Wax-ka-qabashada xidhiidhka taleefoonka, internet-ka iyo hababka kale.
- Horumarinta adeegyada self-service, interactive Voice (IVR) IWM.
- Horumarinta kumbuyuutarka leh chatbot iyo IVR danabaysan.
- Casriyeynta diiwaangelinta danabaysan ee xogta muwaaddiniinta Soomaaliyeed.

---

[12] Pieterson, W. & Dijk, J. V. (2002) Meelaynta kanaalka adeegga dawladda: Taariikhda iyo xeeladaha mustaqbalka. Falanqaynta iyo Naqshadeynta Adeegyada e-Services, 53 - 60.

### iv. Dhijitaaleynta TV-ga

Dawladdu waxay la shaqeyn doontaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) si ay gacan uga geysato hirgelinta sanduukhyada set-top boxes ee TV-yada dhijitaalka ah ee danabaysansi casrigana ah.

### v. Farriimaha Degdega ah

Dawladdu waxay dejin doontaa adeegga fariimaha degdegga ah oo ay isticmaali doonaan dadweynuhu si ay u raadiyaan jawaabaha su'aalaha degdegga ah ee xilliga gaaban. Waxaa la korjoogteyn donaa habka hubinta danabaysan ee kawarcelinta weydiimaha danabaysan ee dadku soo weydiiyaan dawladda.

### vi. Adeegyada Jawaabcelinta Codadka

Dawladdu waxay casriyeyn doonaa habka codwadaagga IVR si loo helo macluumaad loo baahan yahay. Muwaadiniintu waxay fursad u heli doonaan in ay la jaanqaadaan dawladnimadda danabaysan ee nabadgelyadooda iyo horumarintooda u darban 24/7 si waafaqsan shuruucda dalka iyo difaaciisa.

### vii. Baraha Galitaanka Internet-ka Dadweynaha

Dawladdu waxay dejin doontaa barta gelitaanka internetka ee dadweynaha ee afka qalaad loogu soo gaabiyo PIAP taas oo suurtagalineysa in ay la shuraakoobaan goobaha internetka la ijaarto ee gaarka loo leeyahay oo ah bartilmaameedka isticmaaleyaasha aan guriga internet ku heysan. Barta Galitaanka Internetka Dadweynaha (BGID) waxay ku yaalaan goobaha caamka ah, iyada oo ay jiraan shaqaale ka caawiya isticmaalayaasha sida ay uga faa'iidaysanayaa dawladnimada danabaysan. Samaynta PIAP dawladdu waxay uga gol leedahay in ay aqoonsato oo ay yarayso caqabadaha imaan kara.

### viii. E-mailka

Dawladdu waxay dejin doontaa adeegyada e-mailka iyo Isgaarsiinta laba-geesoodka ah ee macaamiisha adeegyada dawladnimadda danabaysan. e-mailku waxaana lagu sarjarayaa noocyadda soo socda:

- **Jawaabta Isdiridda Tooska**: Adeeggan waxa uu sahlayaa xidhiidhka iyo helidda jawaabaha degdegga loogu baahan yahay, lana heli kara24/7 ee dawladnimada danabaysan.
- **Jawaabta gacanta.** Jawaabtan waxay ku habboon tahay xogisdhaafsiga ay dadku sida toos ah ku wada xidhiidhayaan, shaqsi ahaanna xogta iskugu dirayaan. Dadka aragga naafada ka ah waxaa caawin kara shaqaale si toos ah u shaqeynaya, waana in lagu dadaalaa sidii loo hubin lahaa in isticmaalayaasha ay haystaan aalado u oggolaanaya in ay galaan kanaalka ku habboon.

### ix. Miiska Qaabilaadda Soobooqdayaasha

Dawladdu waxay u samayn doontaa miiska qaabilaadda soobooqdayaasha wasaaradda, kaas oo loogu shaqeyn doono dadka toos u yimaada ee u baahan in laga caawiya adeegyada ay u baahan yihiin.

### x. Xarumaha Adeegga Guud

Dawladdu waxay samayn doontaa Xarumaha Adeegga Guud (XAG) taas oo adeeg guud oo danabaysan siin doonta goobaha fog ee uu internet-ka iqliilka ku yahay amaba aan haysan adeeg internetba.

Xarumaha Adeegga Guud (XAG) waxay qaban doonaan hawlaha soo socda:

- **Isgaarsiinta ka Dawladda ku Dadwaynaha:** Isgaadhiintan oo afka qalaad loogu soo gaabiyo G2C waxaa loogu adeegi doonaa danta guud: caafimaadka, waxbarashada, beeraha, horumarinta shaqaalaha, Shaqaaleysiinta dadka, ilaalinta xuquuqda Asaasiga ah, bixinta digniinta musiibooyinka, xuquuqda helitaanka macluumaad ku (XHM) iyo iwm.
- **Baahinta Xogaha** - Xarumaha Adeegga Guud (XAG) waxay xogaha loo baahan yahay ku baahin doonaan taleefoonnada, mareegaha iyo adeegyada danabaysan ee iskuxidhka ee interface loo yaqaanna ee ku baxa afka waddanka iyo afguriyadiisa maxalliga ah.
- **Aqoonta Madadaalada** - Xarumaha Adeegga Guud waa xarumo loogu talagalay qabashada shaqooyin fara badan oo ay ka mid yihiin: abuuridda isdhexgal bulsho, madadaalada, xoojinta tababaradda horumarinta bulshada Soomaaliyeed.
- **Dawladnimadda Danabaysan iyo Adeegyada Danabaysan** - Dadweynuhu waxay awood u yeelan doonaan in ay helaan adeegyada ay bixiyaan waaxyaha wasaaraddaha.
- **Adeegga ka Bulshada ku Dawladda** – Xarumaha Adeegga Guud waa xarumaha ay dadweynuhu ugu soo gudbin doonaan dawladda cabashooyinkooda, codsiyadooda iyo soojeedinnadooda.
- **Dhaqaalaha loo Dhan Yahay** – Xarumaha adeegga guud waxaa lagu ururin doonaa deeqaha lacageed ee ay dawladdu bixiso, lacagta la siinaya dadka dawladda u qabtay shaqada galinbadhka ah, lacagta caddaanka ee loo qoondeeyey hindisayaasha, lacaga loo qorsheeyey daryeelka dadka hawlgabka ah, lacagaha loogu talagalay daryeelka naafada, lacagaha la siinaya dadka jilicsan iyo lacagaha lagu caawinaya waayeelka iwm.
- **Daryeelka caafimaadka** - Xarumaha Adeegga Guud waxay wax badan ka qaban doonaan baahiyaha caafimaad ee bulshada, iyaga oo la xidhiidhi doonaan dhakhaatiirta, kuna xidhi doonaan kaamamka adeegga caafimaad u baahan ee fogfog iyo diiwaangelinta xogta caafimaad ee danabaysan.
- **Beeraha:** Xarumaha Adeegga Guud waxay gacan ka geysan doonaan horumarinta beeraha iyo waxsoosaarka dalka, iyaga oo hannaan danabaysan adeegsan doono.
- **Gacansiinta ganacsiga Miyiga:** Xarumaha Adeegga Guud ee Dawladdu waxay dhiirrigelin doonaan dadka tuulooyinka ku nool ee leh hal-abuurka ganacsi, waxayna qandaraaska saamiga ganacsi ee afka qalaad ku ah Business Process Outsourcing siin doonaan ganacsatada miyiga.

# 7. Hirgalinta Hindisayaasha Dawladnimada Danbaysan

Hirgelinta istiraatijiyadeed ee dawladnimadda danabaysan kuma eko horumarinta tiknoolajiyadda kaliya, waxa gacan ka geysanaysaa horumarinta bixinta adeegga guud iyo dibuqaabeynta hannaanka waxqabad ee hay'adaha gaarka loo leeyahay. Waxaana lagu xallinayaa caqabad kasta oo ka hor imanaysa hirgelinta himilooyinka dawladnimadda danabaysan. Waxay diirada saaraysaa afartan qodob ee soo socda.[13]:

i. **Balaadhinta Aragtida Dawladda**
Ballaadhinta aragtida dawladda waxay kaalin muhiim ah ka qaadataa hufnaanta iyo hawlkarnimada muwaadiniinta. Waxay horumarisaa adeegbixinta dawladda. Waxay qeexdaa qorshe hawleedka xambaarsan aragtida guud ee dawladnimada danabaysan.

ii. **Dibuxoojinta Qaybaha Dawladda**
Aragtida dibuxoojinta qaybaha dawladda waxay dib u xoojisaa wadasocodka, wadashaqeynta iyo iskuduubnida qaybaha dawladda. Waxay ku dhisan tahay dawladnimada danabaysan.

iii. **Kobcinta Awoodda Waaxaha Dawladda**
Dawladdu waxay xoojisaa iskudheellitirka habsami-u-socodka iyo awoodsiinta waaxaha dawladda. Waxay horumarisaa xirfadaha iyo karaanka shaqaalaha waaxaha dawladda.

iv. **Dardargelinta Ganacsiga**
Dawladdu waxay dardargelisaa adeegyada dawladnimadda danabaysan ee waxtarka u leh kobaca ganacsiga iyo suuqgeyn waxsoosaarka. Waxay dhiirrigelisaa horumarinta ganacsiga.

Aragtihan leh qorsha hawleedka ee soo socda ayaa ay ku hagaajinaysaa Istaraatiijiyada Siyaasadda Qaranka ee Soomaaliya.[14]

## 7.1 Aragtida Koowaad: Adeegbixin Nidaamsan

Adeegbixinta nidaamsan waxay wax weyn ka tartaa isbeddelka horumarineed. Waa adeegbixin hufan oo danabaysan. Waxaa lagu hagaajiyaa maamul wanaagga iyo horumarka muwaaddiniinta Soomaaliyeed.

## 7.2 Aragtida Labaad: Kordhinta Aqoonta Dhijitaalka ah ee Bulshada

Ujeeddada istaraatiijiyadeed ee aragtidan labaad waxay diiradda saaraysaa koruqaadidda aqoonta dhijitaalka ah ee bulshada. Waxay casriyeysaa adeegbixinta dawladnimadda danabaysan. Waxay kobciysaa kaabayaasha tiknolojiyada ee logu talagalay horumarinta aqoonta ICT-ga dhijitaalka ah.

---

[13] OECD (dawladnimadda danabaysan) Studies. Dawlad Wax-ku-ool ah oo danabaysan oo loogu talagalay Bixinta Adeegga Dadweynaha ee Smarter, Danmark 2010. QIIMEYN IYO SOO-jeedinno wax-qabadka
[14] Ibid., 1

### 7.3 Aragtida Saddexaad: Koruqaadidda Hufnaanta Dawladda

Ujeeddadan istaraatiijiyadeed ee aragtida saddexaad waxay diiraddasaaraysaa horumarinta hufnaanta maamulka dawladnimadda danabaysan. Dawladdu waa in ay isticmaashaa ICT-ga si ay hawlaheeda u noqdaan kuwa hufan, hagaagsan, hormarsan oo ku habboon adeegga danabaysan ee dawladda.

### 7.4 Aragtida Afraad: Xaqiijinta Daahfurnaanta dawladda

Ujeeddadan istiraatijiyadeed ee aragtida afraad waxay diiraddasaaraysaa daahfurnaanta adeegyada dawladda ee ay muwaadiniintu xaqa ugu leeyihiin in ay si joogta ah uga helaan dukumeentiyada iyo habraacyadda dowladda si loogu oggolaado in ay qayb ka noqdaan kormeerka iyo indha-indhaynta ku saabsan horumarka loo dhan yahay. Ujeeddada ugu weyn waa in ay dawladdu noqotaa mid daacad ah, daahfuran, lala xisaabtami kara, xilgudasho wanaagsan oo muwaaddiniinteeda u xaqsoorta.

## 8. Hindisayaasha Adeegyada Dawladnimada Danbaysan

Geedi socodka isbeddelka danabaysan ee Soomaaliya ayaa shanta sano ee soo socota (2025 - 2029) diiradda lagu saari doona bilaabista iyo hirgelinta qorshayaasha istaraatiijiyadeed ee waaweyn, iyadoo si gaar ah la iskugu taxaluujin doono horumarinta adeegyada dawladnimada danabaysan. Waxaa la dardargelin doonaa horumarinta kartida iyo karaan xirfadeedyada muhiimka ah, hirgelinta mashaariicda qaranka u horseedi doona isbeddel danabaysan iyo hawlgalladda guud ee dawladda oo dhamays tiran. Waxaa la dhiirigelin doonaa hufnaanta, hawlkarnimada iyo hubantida daahfurnaanta adeegbixinta dawladnimada danabaysan.

Himilooyinka istiraatijiyadeed ee hindisayaasha dawladda waxaa lagu tayeynayaa adeegyada dawladda waxtarka u leh horumarinta dadka iyo dalka Soomaaliyeed, hawlgelinta iyo adeegsiga ICT-ga si loo horumariyo habnololeedka bulshada Soomaaliyeed. Si halka la hiigsanayo iyo himilada loo gaadho, waxaa la fulin doonaa dhowr hindise hawleed oo sal u tahay dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya.

Jaantuska hoose ayaa ay ku muujisan yihiin hindisayaasha iyo himilooyinka istiraatijiyadeed ee hagi doona qorshe hawleedyada loo dejiyey dawladnimada danabaysan ee dadka iyo Dalka Soomaaliya.




*Jaantuska 1: Cabbirrada istiraatijiyad ee hirgelinta dawladnimadda danabaysan.*

Iyada oo dalka lagu hagayo himilooyinka istaraatiijiyadeed ee dawladdnimadda danabaysan, waxaa hindisayaasha adeegyada dawladnimadda danabaysan loo kala qaadi doonaa sida soo socota:

## A. Adeegyada dhamayskatiran ee Iswadka ah

### i. Samaynta Xarunta dhexe ee Xariirka Dawladnimadda Danabaysan ee Qaranka

Xarunta Dhexe ee Dawladnimadda Danabaysan waxay xidhiidhisaa dadka deggan dalka, ganacsiga iyo dadka soo booqda dalka. Waxay muhiim u tahay aragtida habboon ee qaranka.

Xarunra waxaa lagu dhisi doonaa iyadoo la adeegsanayo tilmaamaha soo socda:

- Fududeynta raadinta iyo helidda xogaha, iyada oo la isticmaalo jaheeye.
- Diyaarinta xogo ku qoran afafka Ingiriisiga iyo Soomaaliga.
- Naqshadeynta jawaabcelin iyo kordhinta isticmaalka tiknolojiyada mobilada ee bixinta adeegyo fudud.
- Sahlidda xoghelidda dadka baahiyaha gaarka ah qaba.
- Fursadsiinta falcelinta iyo soojeedinnada muwaadiniinta ee habka danabaysan.

### ii. Hindisaha Horumarinta Adeegyada Danabaysan

Hindisahan ayaa ku riixi doonaan hay'adaha dawladda si ay u hubiyaan in dhammaan (100%) adeegyadooda ay *online* yihiin ugu yaraan 80%. Si hindisahan loo gaaro, hay’ad kasta oo ka tirsan dawladnimadda danabaysan waxa looga baahan yahay in ay dejiso qorshaha hirgelinta adeegyada danabaysan kaasoo ku salaysan xaaladda ay ku sugan yihiin adeegyada danabaysan, isla markaana qeexaya adeegyada laga heli kara internet-ka, wakhtiga la hirgelinayo iyo xalalka tiknolojiyada la isticmaalayo.

Hay’ad kasta waxaa looga baahan yahay in ay maamusho mashaariicdeeda hawleed ee adeegyadda danabaysan, qaabeynta iyo hirgelinta adeegyada dhamayska ah ee afka qalaad ku ah end-to-end services oo ay dibueegis iyo cusboonaysiin ugu samaysaa siyaasad kasta iyo habraacyada looga baahan yahay horumarinta adeegyada danabaysan, meeshana looga saaro wax kasta oo caqabad ku ah horumarinta dawladnimadda danabaysan ee Dalka Soomaaliya iyo muwaaddiniintiisa guud.

Qaar ka mid ah adeegyada mudnaanta leh waxaa ka mid ah kuwan hoos ku taxan:

- **Waxbarashadda**: Mashruucan oo ay leedahay Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare, waxaa lagu kormeeri doonaa, laguna hirgelin doonaa ICT-ga cusub ee mashaariicda waxbarashada iyo waxbarashada sare ee danabaysan iwm.
- **Beeraha**: Mashruucan waxa uu hirgelin doonaa danabaynta beeraha Soomaaliya. Waxaa lagu soo gudbin doonaa warbixin ku saabsan tirakoobka suuqyada

waxsoosaarka cusub, warbixin ku saabsan haqabbeelka cuntada ee billaha ah, warbixinta dalagyada iyo suuqyada, bixinta ruqsadaha beeraha, fududeynta dhoofinta xoolaha, faafreebka caafimaadka xoolaha iwm.

- **Danabaynta Caafimaadka:** Ujeeddada Mashruucan waa abuurista xalka maareynta caafimaadka ee isbitaallada iyo rugaha caafimaad ee laga hirgaliyo degmooyinka. Mashruucan waxaa lagu fulin doonaa lahaanshaha Wasaaradda Caafimaadka.
- **Adeegyada Baasaboorka iyo Fiisaha**: Mashruucan waxa uu habayn doonaa adeegyada la xidhiidha codsiga, bixinta baasaboorka iyo fiisaha, waxana ku jiri doonaa codsiga/cusboonaysiinta/beddelka baasaboorka iyo habeynta fiisaha. Mashruucan ayaa waxaa fulinaysaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga.
- **Adeegga ka Dawladda ku ganacsiga**: Hal goob addeeg oo loogu talagalay diwaangelinta ganacsiga oo dhaca gudaha Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaynta oo hadda la isticmaalo, kuna jira wajigii labaad ee hirgelintiisa ayaa la danabayn doonaa si loo casriyeeya.
- **Amniga**: Iyadoo ay masuul ka tahay Wasaaradda Amniga, mashruucan wuxuu kormeeri doonaa hirgelinta xalalka ICT-ga ee laamaha amniga oo ay ka mid yihiin; danabaynta Xabsiyada si loo horumariyo oo looga casriyeeyo habkii hore ee qaddiimka ah ee gelidda iyo kabixidda. Waxaa lagula soconayaa ilaalinta, dhaqancelinta iyo siideynta maxaabiista. Sidoo kale, waxaa lagu danabaynayaa nidaamka maareynta macluumaadka amniga booliiska qaranka, nidaamka aqoonsiga qaranka, badqabka iyo sugidda amniga xabsiyada iwm.
- **Danabaynta Caddaalada**: Mashruucan waxaa lagaga hoos shaqeyn doonaa Wasaaradda Cadaaladda iyo Garsoorka, waxaana laga faa'ideysan doonaa ICT-ga danabaysan si loo fuliyo adeegyada ay bixiyaan hay'adaha Garsoorka ee Dalka Soomaaliya.
- **Canshuur**: Hirgelinta Qorshaha Horumarinta Qaranka (QHQ) waxay u baahan doontaa dhaqaale badan. Si hufnaan loogu ururiyo canshuuraha iyo habka maamulidda dakhligana loogu ilaaliyo, mashruucan waxaa fududaynaysaa in ay dawladdu hawlgeliso agab danabaysan. Mashruucan ujeeddadiisu waa in la dhimo kharashka ku baxa gudashada waajibaadka canshuuraha ururinta si kor loogu qaado ururinta cashuuraha. Mashruucan waxa lagu fulinayaa lahaanshaha Canshuuraha Berriga oo hoos imanaysa Wasaaradda Maaliyadda ee Dawladda Faddaraalka ah ee Soomaaliya.
- **Gaadiidka**: Mashruucan oo ay iska leedahay Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada, waxa uu noqonayaa mid dhijitaal ka dhigi doona adeegyada ay wasaaraddu bixiso oo ay ka mid yihiin: laysinka darawalnimada, diwaangelinta gaadiidka iyo adeegyada kale ee baaxadda iyo saamaynta badan leh. Ujeeddadu mashruucan waa sidii kor loogu qaadi lahaa khibradda adeegbixinta iyo adeeghelidda danabaysan ee dadka Soomaaliyeed.

- **Shaqaalaysiinta**: Mashruucan ayaa ujeedadiisu ay tahay sidii loo heli lahaa fursado shaqo oo ku filan muwaadiniinta Soomaaliyeed, iyada oo la hubinayo in la helo xog ku filan oo ay dawladda ka heli karaan dadka shaqo la'aanta ah iyo sidii loo heli lahaa madal ay ku wada xidhiidhaan shirkadaha iyo shaqsiyaadka shaqooyinka soo baahiyo. Mashruucan danabaysan waxaa lagu fulin doonaa lahaanshaha Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Soomaaliya.

**iii. Hindisaha Mudnaanta Moobaaylka**

Maadaama dadka ay aad u adeegsadaan taleefoonka gacanta, hay'adaha dawladda waaxa ay mudnaan siinayaan adeegbixinta iyo adeeggaadhsiinta danabaysan ee moobaaylka. Arrintan oo ah istaraatijiyad qaran, waxaa looga gol leeyahay in sida ugu habboon dadka loo gaadhsiiyo adeegyada danabaysan ee moobaayllada. Waa hindise ku habbon cilmibaarista iyo waxsoosaarka dalka.

**iv. Horumarinta Habraacyada Gaadhsiinta Adeegyadda Danabaysan**

Habraacan waxa uu hay'adaha ka caawiyaa fulinta, maamulka iyo maareynta mashaariicda adeegyada danabaysan ee ay ka midka yihiin:

- Danabaynta adeegyada guud iyo adeegyada adeegyada gaar.
- Dibuqaabeynta iyo danabaynta habraacyada iyo xeerarka.
- Khibrad-isdhaafsiga iyo naqshadeynta mashaariicda.

## B. Kordhinta Aqoonta Dhijitaalka ee Bulshadda

i. **Barnaamijka Horumarinta Aqoonta Adeegsadaha:** Barnaamijkan waxa uu dhisayaa wacyiga iyo aqoonta dhijitaalka ah ee muwaaddiniinta.

ii. **Barnaamijka Dhijitaalka ah ee Kobcinta Akhris iyo Qoriska :** Xarrumaha adeegyada Guud waxay ka shaqeeyaan kobcinta iyo koruqaadidda akhriska iyo qoraalka dhijitaalka ah ee danabaysan. Waxay gacan ka geystaan abuuridda qolal WhatsApp iyo qolol wadasheekeysiga ee chatbox-ka loo yaqaan. Waxay dadka reer miyiga ah ku tababaraan horumarinta akhriska iyo qoraalka qumman.

iii. **Siyaasadda Ilaalinta Xogaha Qarsoodiga:** Siyaaddan waxaa loo deyey: ururinta, maareynta, habeynta xogaha macaamiisha iyo macluumaadka qarsoodiga ah ilaalintooda. Waxaa lagaga ilaaliyaa in aysan xogaha ku dhicin gacan halis ku ah dadka.

iv. **Siyaasadda Isgaarsiinta Dhijitaalka ah ee Qaranka:** Siyaasadda Isgaarsiinta dhijitaalka ah ee Qaranka (SIDQ) waxay kor u qaaddaa, ilaalisaa, tayeysaa, hannaan qaybaha Isgaarsiinta iyo dhaqaalaha dhijitaalka ah. Siyaasaddan waxay dalka iyo muwaadiniinta u diyaarinaysaa mustaqballka wanaagsan ee Isgaarsiinta Qaranka Soomaaliyeed.

## C. Hufnaanta Dawladda

### i. Hindisaha Wadashaqaynta iyo Isdhexgalka Danabaysan

Hindisaha hufnaanta waxaa loo dejiyey hufnaanta adeegbixinta dawladda iyo adeeghelidda muwaaddiniinta. Tallaabooyinka soo socda ayaa lagu xaqiijiyaa fulinta barnaamijka hufnaanta iyo iskufilnaanta kheyraadka dalka.

- **HabkaXaqiijinta Iskudhafan ee Qaranka (HXIQ):** Habkan waxa uu fududeeyaa diiwaangelinta isticmaalaha iyo gelitaanka aaladaha danabaysan, maaddaama isticmaalayaashu ay isticmaalaan aaladaha danabaysan si ay u helaan dhammaan adeegyada dawladda ee danabaysan ee ay rabaan in ay isticmaalaan qaabka aqoonsiga mar-galka ah ee afka qalaad ku ah single-sign-on authentication mode.
- **Marinka Lacagbixinta Qaranka:** Marinkan waxa uu ogolaanayaa in lagu bixiyo dhammaan adeegyada dawladda hal madal. Waa nidaam u oggolaanayaa lacagbixinta, iyadoo la adeegsanayo kanaallo kala duwan oo ay ka mid yihiin: lacagta moobaayllada, lacagbixinta kaadhka, boorsooyinka iyo isku dhafka bangiyada.

- **Xarunta Isweydaarsiga Xogta:** Xarunta Isweydaarsiga Xogta (XIX) waa xarun dhexdhexaad ah oo loogu talagalay isdhaafsiga xogta Qaranka. Waa xarun xogisweydaarsi oo bar ilaa bar xogaha la isugu dhaafsado taas oo u oggolaanaysa xafiisyada kala duwan ee danabaysan ee hay'adaha dawladdu in ay wadaagaan macluumaadka u muhiimka ah isu dhaafsadaan xogaha dalka.

### ii. Barnaamijka Gelitaanka Kanaaladda badan

Barnaamijkan waxaa lagu hubiyaa in isticmaalayaashu aaladaha danabaysan ay awood u leeyihiin in ay geli karaan adeegyada kannaalada badan. Waxa uu horseedaa korodhka macaamiisha khadka daaran oo looga jeeda macaamiisha *online* ka ah.

Si loo horumariyo helitaanka adeegyada dawladda, waxaa la fuliyaa mashaariicdan soo socda:

- **Xarumaha Adeegyada Guud**: Xarumahan waxay ka shaqeeyaan bixinta adeegyada aasaasiga u ah bulshada, caafimaadka bulshada, ganacsiga, waxbarashada iyo waxsoosaarka beeraha.
- **Kanaalka SMS:** Kannaalkan waxaa uu u qeybsan yahay farriimaha SMS. Waxa uu xaqiijiyaa xidhiidhka dawladda ay kula xidhiidho muwaadiniinta wakhti kasta. Dadweynuhu waxay ku helaan macluumaadka iyo xogaha muhiimka ah ee ay kula socdaan xaaladda dalka.
- **Aqoonsiga Dhijitalka ah ee Khadka Offline ka ah:** Shaqada barnaamijkan waxaa dhijitaaleynta adeegyadii hore oo tooska loo tagi jiray xafiisyada dawladda. Hab *online* ah ayaa loogu adeegayaa muwaaddiniinta. Waa adeeg ku habboon casriyeynta adeegyada dawladda.

### iii. Kaabayaasha ICT-ga Danabaysan

Kaabayaashan waxaa lagu gutaa waajibaadka Hay'adda Isgaadhssiinta Qaranka (HIQ). Sida ku cad Siyaasadda iyo Istaraatiijiyada ICT-ga Qaranka,[15] waxa kaabaan horumarinka karaanka aadanaha.

Kaabayaasha ICT-ga ee dawladeednimadda danabaysan waxtarkooda waxaa ka mid ah:

- Fududeynta helidda xogaha hay'adaha dawladda.
- Kahortagga iyo maareynta musiibooyinka.
- Kuxidhnaanta Xarunta Xogta Qaranka Soomaaliya (XXQS).
- **Xarunta Xogta Qaranka Soomaaliyeed** (XXQS) waa xarun danabaysan oo ka masuul ah ururinta, keydinta, ilaalinta & baahinta xogaha rasmiga ah ee lagu baahiyo warbaahinta dawladda.
- **Adeegga Ganacsiga Qaranka:** Waa adeeg ay Dawladdu ku hormariso ganacsiga guud iyo ganacsiga gaar ee danabaysan. Waa adeeg ku habboon horumarka ganacsiga dalka.

### iv. Hindisaha Guud ee Dawladda

Hindisaha Guud ee Dawladda (HGD) waa hindise qaran oo horumarineed. Ujeeddoonkiisa waa:

- Horumarinta iyo danabaynta dhammaan hay'adaha dawladda.
- Horumarinta qaybahan hoos ku taxan:
    - Maamulka Maaliyadda.
    - Shaqaalaha.
    - Suuqgeynta.
    - Xidhiidhka.
    - Maareynta musiibooyinka.
    - Waxsoosaarka dalka.
    - Maamulka hantida guud.

[15] Ibid. 1, bogga 21

- **Xafiiska Danabaysan**: Xafiiskan oo afka qalaad ku ah E-Office, waa xafiis si toos ah lambareeyo hawlaha hay'adaha dawladda. Waxa uu habeeyaa oo fududeeyaa waraaqaha codsiyada ah ee hay'adaha ka socda ama ku socda. Waxa uu horumariyaa danabayntooda.
- **Maareynta E-maillada**: Maareynta E-maillada waa maareynta danabaysan ee xidhiidhka E- maillada ay is dhaafsadaan xafiisyada dawladda dhexdooda. Waxa uu E-maillada ka difaacaa budhcadda casriga ah ee dhijitaalka ku jabsata xogaha muhiimka ah ee dawladda.

v. **Qaabhismeedka Ganacsiga Qaranka**

Qaabdhismeedka Ganacsiga Qaranka (QGQ) waxaa lagu horumariyaa ganacsiga danabaysan ee dalka. Waxa uu hufaa oo hagaajiyaa kaabayaasha danabaysan ee ganacsiga ee kala ah: waxsoosaarka, suuqgeynta, dhoofinta iyo soodejinta cuskan isdhexgalka[16] ganacsiyada.

vi. **Kaabayaasha Guud ee Muhiimka ah**

Horumarinta kaabayaasha guud ee muhiim ah waxaa lagu dhisaa, laguna dheellitiraa kaabayaasha kala duwan ee dalka Soomaaliya. Hab danabaysan ayaa loogu tayeeyaa kaabashaa dalka oo dhan.

## D. Daahfurnaanta Dawladda

### i. Kaqaybgalka Danabaysan

Dawladdu waxay horumarisaa ICT-ga, uguna sahashaa muwaaddiniinteeda in ay qayb ka noqdaan maamulka, adeegbixinta, go'aanqaadashada iyo dejinta siyaasadda dalka. Kaqaybgalka mudaaddiiinta ee maamul wanaagga iyo horumarka dalka waxaa bulshada Soomaaliyeed loogu sahlaa:

- **Golayaasha Wadaxaajoodka ee Online-ka ah**: Habkan waxa uu muwaaddiniinta u sahlaa in ay fikradahooda iyo falcelintooda ugu soo gudbiyaan dawladda. Waa hab afkaara la isku dhaafsado.
- **Wikis:** Wikiska kala duwan ayey muwaaddiniinta ku qoraan afkaartooda xorta ah. Dawladda waxay kala socotaa falcelinta ra'yiga guud ee dadweynaha ee dimuquraaddiga ah.
- **Baraha Bulshada**: Dawladdu waxay mudnaan siisaa baraha bulshada: Facebook, Twitter IWM. Waxay muwaaddiniinta ku gaadhsiisaa adeegyada kala duwan ee warbaahineed ee danabaysan.

### ii. Bogga Xogta Furan.

Bogga xogta furan waxay dawladda ku soo gudbisaa xogta miisaaniyadda, digniinta iyo daryeelka caafimaadka, fursadaha shaqo. Waa bog u furan dadweynaha Soomaaliyeed.

[16] Dhismaha Ganacsiga Dowladda Queensland 2.0, Australia

## Qorshayaasha iyo Siyaasadaha Furan ee Dawladda

Dawladdu waxay horumarisaa siyaasado dawladeed. Waxay ku muwaaddiniinta kaqaybgalka daahfurnaanta dawladnimada danabaysan. Dhammaan hay'adaha dawladda waxay leeyiin qorsheyaal dawladeed oo Furan. Waaxyaha wasaaradaha waxay daabacaan qorshayaasha Furan eedawladda oo ay si sanadle ah u baahiyaan. Waxaa sal u ah fulinta dawladnimada danabaysan.




*Jaantus 2: Soo jeedinta Habka istaraatiijiyadeed ee dawladnimadda danabaysan.*

# 9. Habka Maamulka Dawladnimadda Danabaysan

Habka Maamulka Dawladnimada Danabaysan (HMDD) waxaa horumariyaa hannaanka maamulka guud ee danabaysan. Waxa uu hagaa oo hagaajiyaa kaalinta ay tignoolajiyaddu ku leedahay maamulka dalka. Habkan oo ah mid ku dhisan horumarin qaran, waxaa loo fuliyaa sidan hoos ku qoran:

- **Wasiirka Wasaradda Isgaarsiinta iyo Tiknooloojiyadda** ayaa hagaya oo hoggaamiyaa, siyaasadda iyo iskudubarid istiraatiijiyadda dawladnimadda danabeysan ee 2025.
- **Guddiga Fulinta Qaran ee Dawladnimadda Danabeysan** Kadib soo magacaabista Hay'adaha hoos kuxusan xubnaha guddiga,iyo kusoo saarista Magacaabis rasmi ah Wasiirka Wasaaradda Isaarsiinta iyo Teknolojiyadda, Guddigu waxa uu mas'uul ka noqanayaa dejinta hal-beegyada casriyeenta adeegyada doowladda, maamulka, isuduwidda iyo dejinta halbeegyada dawladnimadda danabaysan ee Soomaaliya 2025.

  Wasaaradda isgaarsiinta iyo Teknoljiyadda ayaa laga rabaa dajinta TOR ka Guddiga fulinta qaran ee dowladnimada danbabeeysan
- **Waaxda Dawladnimadda Danabeysan:** Waaxdani waxay masuul ka tahay: isuduwidda, farsamada iyo kormeerka hawlaha danabeeynta Adeegyada wasaaradda, Waaxda ayaa noqaneeyso Xogeenta Guddiga qaran ee fulinta dawladnimada danbeeysan.
- **Wasaaraddaha:** Waa Wasaaradaha ugu muhiimsan oo laga rabo ineey danabeeysaan adeegyada daruuriga ah ee maalinlaha loo isticmaalo.



# 10. Qodobadda Xasaasiga ah: Kormeerka, Qiimaynta Guusha iyo Khataraha

Qodobbadan waxay iftiiminayaan qaar ka mid ah qodobadda xasaasiga ah ee guusha fulinta dawladnimadda danabaysan. Waxay tilmaamaan khataraha iyo yarayntooda, qiimeynta iyo lasocodka hawlada dawladda. Waxay ifiyaan fahanka saddex shay guusha muhiim u ah iyo maareynta fashilka mashaariicda.

## 10.1 Guusha

Istaraatiijiyadda dawladdu waxay hirgelisaa dawladnimadda danabaysan. Waxaa fure u ah qodobbadan:

| Qodobbada muhiimka ah ee guusha. | Shuruuda |
|---|---|
| Dawlad udub dhexaad u ah guusha muwaaddiniinta. | • Maamulidda iyo fahanka baahiyaha muwaadiniinta.<br>• Danaynta dawladnimada danabaysan.<br>• Horumarinta tiknoolajiyadda.<br>• Qancinta muwaaddiniinta.<br>• Wacyigelinta bulshada.<br>• Taageeridda wadashaqeynta.<br>• Horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha.<br>• Sugidda amniga danabaysan.<br>• Nidaaminta iyo xoojinta warbaahinta.<br>• Kobcinta waxsoosaarka iyo ganacsiga. |
| Maamulidda Isbeddelka | • Qiimeynta iyo fahanka isbeddelka.<br>• Hagaajinta kheyraadka dalka.<br>• Maamulidda dakhliga.<br>• Kafaa'iideysiga isbeddelka.<br>• Taageeridda shaqaalaha.<br>• Maamulidda mashaariicda.<br>• Istaraatiijiyadeynta qorshayaasha qaranka.<br>• Tixgelinta rabitaanka muwaaddiniinta.<br>• Abaalmarin iyo dhiirrigelinta maamulayaasha.<br>• Kasbashada kalsoonida muwaaddiniinta. |
| Taageerada maamulka | • Taageero xoog leh oo maareyn ah oo loogu talagalay muddada mashruuca dawladnimadda danabaysan<br>• Awoodsiinta maamulka.<br>• Maareynta kalaqaybsanaanta maamulka.<br>• Bixinta adeegyo hufan.<br>• Hoggaamin wanaagsan.<br>• Maamul wanaag.<br>• Isku dubarid mashaariicda dawladda.<br>• Qorsheyn wanaagsan.<br>• Wadashaqeyn wanaagsan.<br>• Kormeerid iyo qiimeyn cilmiyeysan.<br>• Maareynta musiibooyinka. |

| | |
|---|---|
| | ● Fulinta iyo sarreynta sharciga.<br>● Xoojinta siyaasadda danabaysan.<br>● Horumarinta dawladnimadda danabaysan. |
| Xiriirka Muwaaddiniinta | ● Wanaajinta xiriirka muwaaddiniinta.<br>● Kajawaabidda cabashooyinka muwaaddiniinta.<br>● Iskuxirka dawladda iyo muwaaddiniinta.<br>● Horumarinta aaladaha isgaarsiinta.<br>● Horumarinta hal-abuurka dadka.<br>● Hagaajinta xafiisyada xiriirka dadweynaha.<br>● Taageeridda iyo beeridda dhaqanka nabadda.<br>● Tayeynta adeegbixinta iyo adeeghelidda.<br>● Kobcinta aqoonta xiriirka tiknoolajiyadda.<br>● Casriyeynta ICT-ga.<br>● Hagaajinta nidaamka amniga. |
| Khabiirad Kordhinta | ● Kordhinka iyo isdhaafsiga khibradda.<br>● Kobcinta karaanka shaqaalaha dawladda. |
| | ● Shaqaaleysiinta lataliyayaal leh aqoon iyo khibrad horumarin.<br>● Casriyeynta aqoonta ICT-ga ee shaqaalaha dawladda.<br>● Xoojinta iskaashiga dawladda iyo muwaaddiniinta. |
| Ilaha dhaqaalaha | ● Nidaaminta isticmaalka khidmadaha Premium.<br>● Kobcinta dakhliga fardiga.<br>● Xoojinta maalgashiga tiknoolajiyadda.<br>● Kasbashada taageerada caalamka. |
| Siyaasadda Gudaha iyo Dibadda | ● Horumarinta siyaasadda tiknoolajiyadeed ee gudaha.<br>● Horumarinta siyaadda tiknoolajiyadeed ee dibadda. |

### 10.2 Dersidda Khatarta

Istaraatiijiyaddu waxay wax ka qabanaysaa caqabadaha ay wajihi karta dawladnimadda danabaysan.

| Khatar | Saameynta | Yareynta |
|---|---|---|
| Kutiirsanaanta Deeq bixiyayaasha | Sare | • Miisaaniyadda dawladda iyo maalgelinta.<br>• Iskaashiga guud iyo midka gaar. |
| Amniga iyo Ilaalinta Sirta | Sare | • Qaadidda tallaabin amnisugid.<br>• Dejinta siyaasado, xeerar iyo habraacyo.<br>• Danabaynta aqoonsiga qaranka ee dadka.<br>• Danabaynta adeegbixinta aqoonsiga. |
| Teknolojiyada Duugowday | Sare | • Qorsheynta tiknoolajiyadda la adeegsanayo.<br>• Tababaridda xirfadlayaasha ICT-ga.<br>• Maalgelinta cilmibaarista horumarinta. |
| Fashil farsamo | Hoose | • Qorshaha kasoobashada musiibooyinka.<br>• Qorshaha dibukobcinta ganacsiga |
| Iska caabinta isbeddelka | Sare | • Isbeddelka maamulka.<br>• Wax-ka-qabashada xaaladaha deegaanka. |
| | | • Hawlgelinta saamileyda.<br>• Dhisidda wacyiga bulshada. |
| Ku tiirsanaanta soo saaraha/keenaha tiknolojiyada | Sare | • Fidinta aqoonta<br>• Kobcinta karaanka muwaaddiniinta.<br>• Hagaajinta maamulka xiriirka<br>• adeeghelaha iyo adeegbixiyaha. |

| | | |
|---|---|---|
| Helitaanka agabka & kharashka mashruuca oo xad dhaaf ah | Dhexdhexaad | • Horumarinta dakhliga fardiga.<br>• Danabaysan maamulka mashriicda.<br>• Maalgashiga dawladda.<br>• Agaasimidda shuraakada dawladda iyo shirkada gaarka ah. |
| Helitaanka agabka & kharashka mashruuca oo xad dhaaf ah | Dhexdhexaad | • Horumarinta dakhliga fardiga.<br>• Danabaysan maamulka mashriicda.<br>• Maalgashiga dawladda.<br>• Agaasimidda shuraakada dawladda iyo shirkada gaarka ah. |
| Hanashadda iyo Qaadashada hoose | Sare | • Istaraatiijiyada dhijitaalka loo dhan yahay.<br>• Xalka kasbashada macaamiisha.<br>• Yareynta kharashaadka macaamilka.<br>• Kaladoorashada marinnada kannaalada badan.<br>• Habka hirgelinta caddaynta figradaha. |

## 10.3 Kormeerka iyo Qiimaynta ( Monistoring And Evaluation)

Istaraatijiyadda dawladda waxay xoojisaa kormeerka iyo qiimeynta hawlaha hay’adaha dawladda.
Waxay arrinta ku hagtaa, kuna hagaajisaa gaaridda yoolalka istaraatijiyadeed ee dawladda ee danabaysan.

Dowladdu, iyadoo loo marayo hay'adaha maamula ee loogu talagalay e-government-ka, waxay horumarin doontaa qaab-dhismeed kormeer iyo qiimeyn leh ujeeddooyin, natiijooyin, wax-soo-saaryo, iyo tilmaamayaal si cad loo qeexay oo lagu raadraaco horumarka, guulaha, fashilada, iyo casharrada laga bartay mashaariicda e-government-ka ee ka hirgeliyay dowladda. Habkani wuxuu ka caawin doonaa dowladda inay wax ka qabato arrimaha muhiimka ah ee ka taagan hirgelinta e-government-ka, kuwaasoo aan inta badan ahayn kaliya dhibaatooyin farsamo, balse sidoo kale la xiriira maaraynta nidaamyada iyo wacyigelinta dadka.

Tilmaamayaasha lagu horumarin doono habka kormeerka iyo qiimeynta ayaa loo isticmaali doonaa sidii qalab lagu cabbiro saameynta Istiraatiijiyadda iyo Khariidadda-habeynta e-government-ka Soomaaliya. Sidoo kale, waxa loo adeegsan doonaa qaab waxbarasho si looga faa’iidaysto casharrada laga bartay hirgelinta mashaariicda.

.

## 11.Qorshe Hawleedka Istaraatiijiyadda Dawladnimada Danabaysan

Dawladdu waxay leedahay qorshe hawleed iyo istaraatijiyad. Waxay ku fulisaa dawladnimada danabaysan. Qorshayaashan waxay u qaabaysan yihiin sida hoos ku qorsheysan oo ay dawladda u fulisaa:

- **Marxaladda 1aad:** Dibuhabeynta iyo hagaajinta adeegbixinta dawladda.
- **Marxaladda 2aad:** Koruqaadista iyo fidinta adeegga danabaysan.
- **Marxaladda 3aad:** Kobcinta hufnaanta wadashaqeynta hay'adaha dawladda.

| | 2025 - 2026 | 2026 – 2027 | 2027 – 2029 |
|---|---|---|---|
| | **Marxaladda 1aad Hagaajinta adeegbixinta.** | **Marxaladda 2aad Koruqaadidda** | Marxaladda 3aad Kobcinta iskaashiga. |
| 1. Nidaamka tooska ee adeegyada danabaysan. | 1.1: Sameynta Xarunta Dhexe ee Dawladnimadda Danabaysan ee Qaranka. | 1.2 Wajiga 2-aad: Horumarinta Adeegyada danabaysan. | **1.2 Wajiga 3-aad: Horumarinta Adeegyada danabaysan.** |
| | 1.2: Hindisaha mudnaanssiinta adeegga moobaylka. | 1.3 Wajiga 2-aad: Hindisaha mudnaansiinta adeegga moobaylka. | **1.3 Wajiga 3-aad: Hindisaha mudnaansiinta adeegga moobaylka.** |
| | 1.3 Mudnaansiinta adeegga moobaylka. | | |
| | 1.4 Horumarinta habraacyada adeegbixinta danabaysan. | | |
| 2. Dhijitaaleynta Bulshada: | 2.1: Horumarinta aqoonta isticmaalayaasha adeegga danabaysan. | 2.1 Siikobcinta aqoonta adeegsadayaasha adeegga danabaysan. | **2.1 Siijoogteynta aqoonta adeegsadayaasha adeegga** |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | | | **danabaysan.** |
| | 2.2: Horumarinta akhriska iyo qoraalka dhijitaalka ah. | | |
| | 2.3: Horumarina Siyaasadda dhijitaalka ah ee ilaalinta siraha. | | |
| | 2.4: Horumarinta Siyaasadda isgaarsiinta dhijitaalka ah ee qaranka. | | |
| 3. Kordhinta Waxtarka Dowladda: | 3.1 Hindisaha wada shaqaynta adeegyada danabaysan | 3.2: Horumarinta gelitaanka kannaalka badan ee danabaysan. | **3.4: Wajiga 2-aad: Horumarinta hindisayaasha guud ee dawladda.** |
| | 3.3: Horumarinta kaabayaasha ICT-ga ee dawladnimadda danabaysan. | 3.3: Horumarinta kaabayaasha ICT-ga ee dawladnimadda danabaysan | |
| | | 3.4: Horumarinta Hindisayaasha guud ee dawladda. | |
| | 3.5: Dhismaha ganacsiga qaranka. | 3.6: Horumarinta kaabayaasha muhiimka ah ee dawladda. | |
| 4. Xaqiijita Dawlad Daahfuran | 4.1 Kaqaybgalka dawladnimada danabaysan. | 4.2: Xariir iyo xog daahfuran. | |
| | **4.3 Daahfurnaanta siyaasadaha iyo qorshayaasha dawladda.** | | |

# ISTARAATIJIYADDA DOWLADNIMADA DANEBAYSAN

(eGovernment Strategy 2025-2029)

https://Moct.gov.so/